# QODOBBO LA XIRIIRA SAAMI AMAAHEED

## Cutubka 1aad
Qodobbo Guud

### Qod. 1
### Dabeecadda iyo Waxtarka

Saami amaaheedku wuxuu siinayaa qofka sharci ahaan haysto xaq ah in uu ka dalbado deynqabaha, markuu tusiyo kadib, in uu sameeyo waxa ku qoran.

### Qod. 2
### Abla-Ablaynta

Saami amaaheedku wuxuu u qaybsamaa:

a) sitaha, haddii lagu wreejin karo gacan saar;
b) caadi, haddii lagu warejin karo dhabarka dambe oo laga saxiixo;
c) magac gaar ah ku qoran, haddii lagu wreejin karo ayadoo lagu qoraayo kambiyaalaha korkiisa iyo diiwaanka soo saaraha faallo gaaban.

### Qod. 3
### U Rogid

1. Saamiga ee qofka sitaha ah waxaa lo rogi karaa saami magac gaar ah ku qoran kadib markuu soo codsado kharajkana uu bixiyo qofka haysto;
2. Saamiga magaca gaarka ah ku qoran waxaa loo rogi karaa kan qofka uu sito kadib marka uu soo codsado kharajkana bixiyo qofka sharci ahaan ku qoran, marka laga reebo xaaladaha rogidda uu si cad u reebay soo saaraha.

### Qod. 4
### Isukeenid iyo Jejebin

1. Kambiyaaleyaasha oo si xiriir ah loo soo saaray wuxuu soo saaraha isugu keeni karaa hal saami oo dhifsane ah, kadib markuu soo codsado kharajkana uu bixiyo qofka haysto;
2. Isla qaabkaas oo kale , kambiyaaleyaasha dhifsanaha ah waxaa loo sii jejebin karaa qaybo yar yar.

### Qod. 5
### Xureynta Deynqabaha

Deynqabaha oo fuliyo hawshsa qofka haysto saami waa laga xureynaa waajibka xataa haddii qofka haysto kambiyaalaha uusan ahayn qofka leh xaqaas, bishardi qofka gudanayo waajibka in uu ka madaxbanaan yahy khiyaano ama eed culus.

### Qod. 6
### Ka Reebitaan la duri karo

1. Qofka haysto kambiyaale, deynqabaha wxuuu ku horistaagi karaa oo keliya:
   a) ka reebista shaqsiga ah ee la xirirto haystaha;
   b) ka reebis ka timid saxiix been abuur ah ee deynqabaha xaggiisa ah ama cillad xagga awooodda ah ama wakaaladda ee waqtiga la soo sameynayay kambiyaalaha;
   c) ka reebis la xiriirto qaabka saamiggaa, ama xaaladdiisa xaraf ahaan;
   d) ka rebis la xiriirto maqnaashaha shuruudo lagama maarmaanka u ah isticmaalkiisa;

2. Deynqabaha wuxuu u soo jeedin karaa qofka haysto kambiyaale ka reebis ku saleysan xiriirro gaar ahaaneed ee haystayaashii hore oo keliya haddii ay jirtay markuu gadanaayay kambiyaalahaa**,** uu haystuhu si kutalagal ah u isticmaalay qaab dhaawacayo isla deynqabaha.

**Qod. 7**
**Ku Hanasho Niyad Sami**

Qofkii si niyadsami ah ku hanto lahaanshaha Saami amaaheed**,** si waafaqsan qodobbada habeynaayo wareegooda, qasab kuma ahan sheegashada saamiga.

**Qod. 8**
**Xuquuqaha Dheeraadka ah**

Wareejinta saami amaaheedku waxay saameyneysaa xataa xuquuqaha dheeraadka ah ee iyada la xiriirto.

**Qod. 9**
**Xiriirada Deynta ah**

1. Rahanka, la wareegidda, xaraashka, iyo xiriirrada kale ee xuquuqaha kor ku xusan ee saami amaaheedku ma yeelanayo saameyn haddii aan lagu fulin isla kambiyaalaha;
2. Xirirrku ma u gudbayo abaalmarinnada iyo faa'iidooyinka kale ee aan la hubin ee ka dhashay kambiyaalahaa.

**Qod. 10**
**Intifaaca Saamiga**

1. Haddii lagu intifaaco saami amaaheed, faaiidada waxay u gudbeysaa abalmarinnada iyo faa'iidooyinka kale ee aan la hubin ee ka dhashay saamiga;
2. Lacagta abaalmarinta ah waa in loo maalgeliyo qaab mirodhal ah, si waafaqasan heshiiska dhinacayada ama, haddii uusan jirin, amarka garsooraha.

**Qod. 11**
**Saami Amaaheed Khaas ah**

Qodobbada la xiriiro saami amaaheedka waxaa lagu dabaqi karaa xataa:

a) saamiyada wakiilnimo ee badeeco: ee siinayo qofka sharci ahaanta u haysto lahaanshaha badeecada ku cad, iyo xuquuqda uu ku weydiisan karo in gacanta laga saaro, kuna intifaaco ayadoo loo soo wareejinaayo saamiga;
b) saamiyada raasumaalka ( titotoli azionari): ee siinayo qofka sharci ahaanta u haysto dhammaan xuquuqaha hantiyeed ee qofeed oo ku xiran tayada qofka xubinta ka ah shirkadda ganacsiga ee soo saartay.

**Qod. 12**
**Saamiyada aan Habooneyn**

Qodobbada la xiriiro saami amaaheedyada laguma dabaqi karo:

a) dokumentiyada loo isticmaalo in lagu wareejiyo xaq oo keliya iyadoo aan la ilaalineynin qaababka wareejinta ee saamiyada muuqdo;
b) dokumentiyada loo isticmaalo in ay caddeeyaan oo keliya qofka iska leh xaqa hal adeeg (dokumentiyada wax sharciyeeyo).

**Cutubka 2aad**

Saamiyada Siteyaasha

**Qod. 13**
**Wareejinta**

Wareejinta saamiga sitaha ah waxa lagu isticmaalaa ayadoo la dhiibaayo.

**Qod. 14**
**Milkiyad Sharciga Waafaqsan**

Qofka haysto saami site ah wuxuu sharci u leeyahy in uu ku isticmaalo xuquuqda ku qoran sida waafaqsan soo bandhigista saamiga.

**Qod. 15**
**Xadka Xuriyadda Soo Saarista**

Saami Amaaheedyada uu ku jiro waajibadka ah in la bxiyo lacag, ma soo saari karo sitaha, haddii aysan ahayn xaaladaha uu sharcigu qeexay.

**Qod. 16**
**Doorsoomidda Kambiyaalaha**

Qofka haysto kambiyaale doorsoomay, oo aan u qalmin in uu wareego, haseyeeshee la aqoonsan karo, xaq wuxuu u leeyahay in uu ka helo soo saaraha hal kambiyaale oo u dhigmo, asagoo soo celinaayo kii hore iyo in uu dib u celiyo kharajka.

**Qod.17**
**Lumis ama Xadid Kambiyaale**

1. Haddii aan jjrin qodobbo sharci gaar ah, lama oggolo deynbaxid kambiyaale ee site uu ka lumay ama laga xaday;
2. Si kastaba ha ahatee, haystaha kambiyaale site ah ee caddeeyo in uu ka lumay ama laga xaday, wuxuu, qaabka caadiga ah, ka dalban karaa hey'adda soo saartay in loo sameeyo kadib markay kasoo wareegto muddada uu kambiyaalaha ku dhacayo;
3. Deynqabaha ka hor inta muddada aysan dhammaanin, haddii uu u sameeyo adeeg qofka uu ka lumay ama laga xaday kambiyaalaha, waa ka xuroobaa waajibaadkiisa, marka laga reebo in la caddeeyo cillad ka muuqato lahaanshaha qofka keensaday;
4. Waxaa laga saaraa, si kastaba ha noqotee, sababaha caqli galka ah ee uu iibiyaha ka muujiyay sitaha kambiyaalaha.

**Qod. 18**
**Baab'inta Kambiyaalaha**

1. Qofka haysto kambiyaalaha sitaha, oo caddeyo in uu ka baaba'ay kambiyaalaha, wuxuu ka dalban karaa soo saraha in uu u sameeyo nuqul ama kambiyaale la mid ah kii hore asaga oo bixinaayo kharajka hawshas la xiriirto;
2. Haddii cadeynta in kambiyaalaha uu baaba'ay la gaariwaayo, waxaa la dabaqaa qodobbada ku qorn qodobka hore;
3. Amarrada ku qoran qodobkan, iyo kuwa ku qoran faqradda labaad, sedexaad iyo afraad ee qod. 17 laguma dabaqayo lacagta xaashida ah ee bankiga.

## Cutubka 3aad

Kambiyaalaha Caadiga ah

### Qod. 19
### Milkiyadda Sharciga Waafaqsan

Qofka haysto kambiyaalaha caadiga ah, wuxuu xaq u leeyahay in uu ku isticmaalo xaqa ku qoran, ayadoo sal looga dhigaayo wareejinno socdo ee isdabajoogo.

### Qod. 20
### Wareejinta

1. Wareejinta kambiyaalaha caadiga ah waxaa lagu sameeyaa warejin;
2. Wareejintu waa in lagu dul qoraa saamiga uuna saxiixo wareejiyaha;
3. Wareejintu sax bay noqoneysaa xataa haddii ay ka maran tahay astaanta wareejiyaha (wareejin iska cad);
4. Wareejinta sitaha waxay la mid tahay wareejin caddaan ah.

### Qod. 21
### Wareejin Shuruudeysan ama bar ah

1. Shardi kastoo si ula kac ah loo geliyo wareejinta, waxay noqonayaa sidii iyada oo aan lagu qorin oo kale;
2. Ansaxinta qayb ahaan way madhan tahay.

### Qod. 22
### Saameynta Wareejinta

1. Wareejintu waxey wareejineysaa dhamaan xuquuqaha la xiriiro kambiyaalaha;
2. Haddii hal kambiyaale lagu wareejiyo qaab caddaan ah, qofka haystaha ah wuxuu buuxin karaa wareejinta asagoo magaciisa ku wareejinaayo ama magaca qof kale, ama wuu wareejin karaa kambiyaalaha mar kale ama uu u gudbin karaa qof kale asaga oo aan buuxineynin wareejinta iyo isaga oo aan soo saareynin mid cusub.

### Qod. 23
### Waajibaadka Wareejiyaha

Haddii aan si kale sharciga u sheegin ama shardi kale ee ka soo ifbaxayo kambiyaalaha aan lagu xirin, wareejiyuhu kuma qasbana haddii waajib gudasho la'aan ay ka timaaddo dhinaca soo saaraha.

### Qod. 24
### Wareejin Kasab ama Wakaalad

1. Haddii wareejinta lagu daro shardi keenenayo siismo wakaalad ee kasab, qofka wareejiyaha ah wuxuu isticmaali karaa dhamaan xuquuqaha la xiriiro kambiyaalaha haseyeeshee ma wareejin karo marka laga reebo wakaaladda;
2. Soosaaraha wuu is hortaagi karaa wareejiyaha haysto wakaalad marka uu isticmaalo awoodihii gaarka ah ee uu isticmaali lahaa wareejiyaha;
3. Waxtarka wareejinta lagu wareejiyo wakaald kuma dheceyso dhimasho ama awood la'aan ku timaaddo wareejiyaha.

## Qod. 25
## Wareejinta Rahan

1. Haddii wareejinta lagu soo daro qodob keenayo in uu sameesmo rahan, wareejiyuhu wuxuu adeegsan karaa dhammaan xuquuqaha ee la xiriiro kambiyaalaha; laakiin haddii uu sameeyo wareejin kale, wareejintaas uu sameeyay waxay la mid noqoneysaa oo kaliya sida wareejin wakaalad;
2. Soo saaruhu kama hor istaagi karo wareejyaha damaanadda waxyaabaha ka reeban ee ku saleysan cilaaqaadka shaqsiyadeed ee uu la lahaa wareejiyaha, marka laga reebo, haddii wareejiyuhu kambiyaalaha helay, uu si ula kac ahna uu u dhaqmay waxyeeleynta soosaaraha.

## Qod. 26
## Wareejin

Bedbelid kambiyaale caadi ah si ka duwan qaabka wareejintu waxay dhalineysaa raadadka siismada caadiga ah oo kale.

## Qod. 27
## Deynbixid

1. Haddii ay dhacdo lumid, xatooyo ama baabi'in kambiyaale caadi ah, mulkiiluhu wuu u dacwoon karaa qofka deynta leh wuxuuna weydiin karaa lumista kambiyaalaha isagoo racfaan u qaadanaya Guddoomiyaha Maxkmadda Gobolka meesha kambiyaalaha laga bixinaayo. Rafcaanka waa inay ka muuqdaan shuruudaha lagama maarmaanka u ah, haddii uu yahay kambiyaale cad, waxyaabaha ku habboon ee lagu garan karo;
2. Gudoomiyaha Maxkamaddu, markuu ku tallaabsado baaritaannada ku habboon ee xuquuqda codsadaha oo runta xaqiiqadana ay ku tiirsantahay,

wuxuu ku dhawaaqayaa dekreeto lumista kambiyaalaha, wuxuuna amrayaa in dekreetada lagu wargeliyo deynqabaha, iyo in lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, wuxuuna amrayaa in la bixiyo lacagta soddon maalmood kadib oo ka bilaabaneyso maalinta la baahiyay. Haddii maalintaas kambiyaalaha uusan weli dhicin, waqtiga bixinta lacagta waxay ka bilaabaneysaa taariikhda dhicitaanka;

3. Dekreetada lumista kambiyaalaha waa lagu wargelinaa deynqabaha waxaana lagu baahinayaa Faafints Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda waxaana lagu wargelinaa dacwoodaha ama codsaduhu;
4. Lacagta lasiiyay deynqabaha kahor inta uusan helin wargelinta dekreetada lumista, waxay xur ka dhigeysaa deynqabaha.

## Qod. 28
## Durista

1. Isla muddada ku xusan faqradda labaad ee qod. 27, qofka haysto kambiyaalaha wuxuu ka hor durikaraa dekreetada lumista maxkamadda ku dhawaaqday horteeda asaga oo ka cabanaayo; cabashadu waxaa loo jeedinayaa qaabka caadiga ah waxaana lagu wargelinayaa codsadaha iyo deynqabaha;
2. Durista lama oggolaan karo, haddii cabashada aan lala geynin kambiyaale amaaheedka kaalinta maxkamadda;
3. Haddii durista la diido, kambiyaalaha waxaa gacanta laga saarayaa, qofka ay caddaato in uu xaq u leeyahay xuquuqda lumista.

**Qod. 29**
**Xuquuqda Muddac**

Kahor dhicitaanka muddada ku xusan faqradda labaad ee qod. 27, codsaduhu wuxuu sameynkaraa dhammaan qaraarrada muuqdo inay ilaalinayaan xuquuqdiisa; iyo, haddii kambiyaalaha uu dhacay amase lagu bixin karo dalab, wuu dalban karaa adeegga ku dhex tilmaaman isagoo bixinayo damaanadda ku habboon, ama la weyddiisto maxkamadda deebaaji wadarta u dhiganta.

**Qod. 30**
**Saamaynta Deynbixidda**

1. Kadib marka ay dhamaato muddada lagu xusay faqradda labaad ee qod. 27 iyadoo aan laga keenin is hortaag, kambiyaalaha waxtar dambe ma yerelanayo. Si kastaba ha noqotee, waxaa laga saarayaa sababaha suurtagalka ah ee haystaha marka loo eego qofka helay deynbixidda;
2. Qof kasta oo helo dekreetada deynbixidda wuxuu, isaga oo tusinaayo dekreetada nafteeda iyo caddeynta kaaliyaha maxkamadda oo muujineyso

caddeyn la'aanta durista waqtigii loogu tala galay, wuxuu weydiisan karaa in la fuliyo waxa ku qoran kambiyaalaha, ama , haddii kambiyaalaha uu yahay mid cad isla markaana muddadiisu aan dhicin, in ay bixiso nuqul ciddii soo saartay.

**Cutubka 4aad**
Kambiyaaleyaasha Magac ku Qoran

**Qod 31**
**Xaqa Milkiilaha**

Milkiilaha kambiyaalaha magaca ku qoran wuxuu sharci u leeyahay in uu isticmaalo xuquuqda ku dhex xusan qaabka uu doorbidayo sida ku xusan kambiyaalaha wafaaqsanna waxa ku qoran diiwaanka soo saaraha.

**Qod. 32**
**Wareejinta**

1. Wareejinta kambiyaalaha magaca gaarka ku qoran waxaa loo fuliyaa si caadi ah iyadoo lagu xuso magaca iibsadaha saamiga iyo diiwaanka bixiyaha;
2. Haddii aysan qodobo sharci oo kaladuwan u sheegin, wareejinta kambiyaalaha waxaa sidoo kale lagu samayn karaa iyadoo la soo saaro saami cusub oo ku magacaaban mulkiilaha cusub oo waafaqsan faallada ku qoran diiwaanka bixiyaha;
3. Qof kasta oo codsada madaxqorka saamiga ee qof kale, ama in la bixiyo kambiyaale cusub oo ku magacaaban kan dambe, waa inuu caddeeyo aqoonsigiisa iyo awoodda uu u leeyahay inuu ku habeeyo caddeyn nootaayo ah. Haddii madaxqorka iyo bixinta uu soo codsado iibsaduhu, kan dambe waa inuu soo bandhigayaa saamiga oo uu xaqiisa ku caddeeyaa ficil nootaayo ah;
4. Faallada diiwaanka iyo kambiyaalaha ku qoran waxaa lagu sameeyaa taxadarka iyo mas'uuliyada soosaaraha;
5. Soosaaraha oo u hogaansamo wareejinta sida iyo qaabka sharciga waafaqsan waa laga dhaafay mas'uuliyadda, marka laga reebo kiiskiisa khaladkiisa.

**Qod. 33**
**Beddelka lagu Sameeyo Wareejinta**

1. Haddii aan si kale sharciga u sheegin, kambiyaalaha magaca gaarka ku qoran waa la beddeli karaa xataa iyada oo wareejinta oo marayso sugitaanka nootaayada;
2. Wareejintu waa inay taariikheysan tahay, uuna saxeexay wareejiyaha, waana inay ku jiraan tilmaamaha wareejiyaha. Haddii kambiyaalaha si buuxdo aan loo siidayn, waxaa sidoo kale loo baahnaanaa saxiixa qofka wareejiyaha;
3. Beddelka lagu sameeyo wareejinta wax saamayn ah kuma laha soosaaraha, ilaa lagu qoro isla diiwaankiisa. Qofka wareejinaayo oo muujiyo in uu heysto kambiyaale iyadoo uu ku helay wareejinno oo isdaba joog ah wuxuu xaq u leeyahay inuu helo in lagu qoro faallada wareejinta ee diiwaanka soo saaraha.

**Qod. 34**
**Milkiyadda Xaddidan ee Amaahda**

1. Milkiyadda xaddidan ee amaahda saameyn kuma yeelan karto soosaaraha iyo dadka seddexaad, haddii aysan ka imaanin faallo kambiyaalaha iyo diiwaanka soo saaraha;
2. Faalladaas waxaa lagu sameeyaa qaabka lagu qeexay faqradda saddexaad ee qod. 32.

**Qod. 35**
**Intifaaca Amaahda**

Qofka iska leh intifaaca amaahda ee lagu xusay kambiyaale magac gaar ah ku qoran wuxuu xaq u leeyahay inuu helo kambiyaale ka baxsan ama ka duwan kan milkiilaha.

**Qod. 36**
**Rahmidda Kambiyaalaha**

1. Marlka la rahmaayo kambiyaale magac gaar ah ku qoran waxaa, sidoo kale, lagu samayn karaa in la dhiibo kambiyaale, oo ku wareejisan shuruudaha damaanadda ama kuwo kale oo u dhigmo;
2. Qofkii damaanad wax ku wareejiyo ma u wareejin karo kambiyaalaha dadka kale, marka laga reebo wareejinta dariiqa wakaaladda.

**Qod. 37**
**Deyibixid**

1. Haddii uu lumo, la xado ama burburin kambiyaale magacaaban, qofka ku magacaaban iyo qofka loo soo wareejiyay waxay u ashtakoon karaan soo-saaraha, weydiisan karaana Maxkamadda deyn bixin in loo oggolaado iyadoo la raacayo qodobbada qod. 27;
2. Haddii uu yahay kambiyaale magacaaban, codsaduhu wuxuu adeegsan karaa xuquuqaha kambiyaalaha ay wadaagaan isla saamiyada sidoo kale wuxuu sugayaa muddada ku xusan cutubka labaad ee qod. 27, bixinta - meeshii ku habboon - amni habboon;
3. Hoos u dhaca ayaa baabi'iya amniga, laakiin ma saameynayso sababo kasta oo loo haysto cidda heysatay cinwaanka cusub.

**Cutubka 5aad**
Qodobbo kama Dambeys

**Qod. 38**
**Dib u Celin Xeerar gaar ah**

Qodobboda guud ee xeerkan waa la dabbaqayaa maadaama aan si kale loo sheegin qodobbada xeerarkan gaarka ah ee lagu xusay qodobbada soo socda.

**Qod. 39**
**Kambiyaalaha iyo Qalabka wax lagu kala Beddesho**

Kambiyaalaha iyo qalab wax lagu kala beddesho waxaa lagu habeeyaa si waafaqsan heshiisyada Geneva 7 Juun 1930, si waafaqsan Lifaaqa A.

**Qod. 40**
**Jeegga Bankiga iyo Jeegga Wareega**

Jeegga bankiga iyo jeegga waregga waxaa lagu habeeyaa si waafaqsan heshiisyada Geneva 19 Maarso 1931, iyo si waafaqsan Lifaaqa B.

**Qod. 41**
**Lacagaha Bangiga**

Lacagaha bangiyada iyo kambiyaaleyaasha kale ee guud ee Hey'adda soosaarto waxaa nidaamiya sharciyo gaar ah.

**Qod. 42**
**Damaanadaha kale**

Saamiyada iyo dammaanadda shirkadaha ganacsiga, dammaanadaha dhigashada, dammaanadaha gaadiidka iyo dammaanadaha kale oo u dhigma waxaa nidaamiya qodobbo gaar ah ee qaanuunka madaniga ah, ganacsiga iyo badda.

---

**Lifaaqa A**

**QODOBBO LA XIRIIRO KAMBIYAALAHA IYO AMAAHDA LACAGAHA**

**CINWAANKA 1AAD**
Kamblaayaha

**Cutubka 1aad**
Soosaarista iyo Qaababka Kambiyaalaha

**Qod. 1**

Kambiyaalaha waxaa ku jira:

a) magaca kambiyaale ", oo la dhex galiyay macnaha guud ee damaanadda oo lagu muujiyey luqadda ay ku qoran tahay;
b) amar aan shuruud lahayn oo lagu bixiyo lacag cayiman;
c) magaca qofka loo qoondeeyay inuu bixiyo (drawee);
d) muujinta waqtiga kama dambeysta ah;

e) muujinta goobta bixinta;
f) magaca qofka loo diray, ama amarkiisa bixinta lagu bixinayo (amaahde);
g) tilmaanta taariikhda iyo goobta lagu soo saaray kambiyaalaha;
h) saxiixa qofka soosaaraya waraaqda kambiyaalaha (horkac).

**Qod. 2**

1. Damaanadaha oo ka maqan mid ka mid ah shuruudaha lagu sheegay qodobka kor ku xusan looma xisaabayo kambiyaale, marka laga reebo xaaladaha lagu sheegay faqradaha soo socda;
2. Kambiyaalaha aan lahayn tilmaanta dhicitaanka waxaa loo tixgelinayaa in lagu bixin karo aragga;
3. Haddii uu ka maqan yahay tilmaanta gaarka ah, goobta lagu cadeeyeyay dhinaca ku xigo magaca qofka lagu magacaabay in uu bixiyo, waxaa loo tixgeliyaa goobta lacag bixinta in ay la mid tahay degaanka maxalliga ah ee qofka lagu magacaabay in uu bixiyo;
4. Kambiyaalaha meesha laga soo saaray aan la xusin waxaa loo tixgelinayaa in lagu saxiixay goobta ku tilmaaman dhinaca magaca qofka jeegga soo saaray;
5. Haddii meelo badan oo lacag bixinta ah lagu muujiyo, waxaa la fahamsan yahay in qofka wato uu ku soo bandhigi karo kambiyaalaha meel kasta oo ka mid ah aqbalaadda iyo bixinta intaba.

**Qod. 3**

1. Kambiyaalaha wuxuu noqon karaa amarka isla qofka jeegga soo saaray;
2. Wuxuu noqon karaa ganacsi ee isla qofka jeegga soo saaray;
3. Wuxuu noqon karaa ganacsi ee qof kaloo saddexaad.

**Qod. 4**

1. Kambiyaalaha waxaa lagu bixin karaa deegaanka qof saddexaad, sidoo kale meel ka duwan meesha uu ku yaallo degaanka qofka lagu magacaabay in uu bixiyo;
2. Haddii aan la qorin in lacag bixinta uu u sameyn doono qofka lagu magacaabay in uu bixiyo, qof saddexaad, waxaa loo qaadanaa in uu bixin doono qofkaas saddexaad.

**Qod. 5**

1. Kambiyaalaha lagu bixin karo aragtida ama waqti la hubo ee aragti, qofka jeegga soo saaray wuxuu amri karaa in lacagta ay noqoto mid dhaliso dulsaar. Nooc kasta oo kale oo kambiyaale ah, ballanka dulsaarka waa sida iyada oo aan la qorin oo kale;
2. Dulsaarku wuxuu ka soo bilaabanayaa taariikhda kambiyaalaha, haddii aan taariikh kale oo ka duwan la sheegin.

**Qod. 6**

1. Kambiyaalaha lacagta ku qoran haddii ay tahay erey ahaan iyo lambar ahaanba, waa ay fiican tahay, haddiise ay kala duwanaadaan, waxaa la ictimaadaa lacagta ereyada lagu muujiyay;
2. Haddii lacagta la bixinaayo ay kambiyaalaha ku qoran tahay hal mar wax ka badan ayadoo ereyo ama lambar ah, haddii ay kala duwan yihiin, waxaa la ictimaadaa lacagta yar.

**Qod. 7**

Haddii kambiyaalaha uu ku jiro saxiix qof aan lahayn awood uu ku qaado waajibaadka kambiyaalaha, ama saxiix la been abuuray ama dad aan jirin saxiixooda, ama saxiix sabab kastooy tahay aan khasbeynin dadka saxiixay kambiyaalaha, ama magacooda lagu saxiixay, waajibaadka dadka kaloo saxiixay kambiyaalaha waxay ahaanayaan kuwo sax ah.

**Qod. 8**

Saxiix kasta ee kambiyaale waa in uu ku jiraa magaca qofka ama shirkadda qofka masuulka qaadayo.

**Qod. 9**

Ilmaha yar ee madax bannaan ee aan loo oggoleyn in ay sameeyaan ganacsi iyo dadka tabarta daran looma oggola inay qaadaan waajibaad kambiyaale haddii saxiixoodu uusan ku wehelinin kan wakiilkiisa, oo leh qodobka "caawimaad" ama wax u dhigma. Haddiise laga saaro qodobkaas ama wax u dhigmo, wakiilka ayaa shaqsi ahaan uu waajib ku noqonayaa.

**Qod. 10**

Waalidka ama ilaaliyaha aan loo fasaxin inuu ganacsado isagoo ku hadlaya magaca qofka da'da yar ama aan dhameyn wuxuu ku qaadi kaaraa waajib kambiyaale magacooda, asagoo ka haysto ogolaansho maxkamadda awoodda u leh.

**Qod. 11**

Qof kasta oo saxeexa kambiyaale isaga oo ah wakiil qof aan awood u lahayn inuu ku kaco, waajib ayaa kambiyaale ahaan fuulaaya sidii inuu isagu iskaa saxeexay; iyo, haddii uu bixiyay, wuxuu leeyahay isla xuquuq la mid ah xuquuqda kii la sheegay inuu matali lahaa. Isla qodobkaan ayaa quseeya wakiilka ka gudbay awooddiisa.

**Qod. 12**

1. Awoodda guud ee qof uu isku waajibyo isaga magaca iyo danta dad kale mala awaal ahaan uma horseedeyso, haddii aan si kale loo cadeynin, in uu isku waajibiyo kambiyaale ahaan;
2. Awoodda guud ee qof isku waajibinayo magaciisa iyo danta qof ganacsato ah, waxaa soo gelayo xataa sidoo kale in uu isku waajibiyo kambiyaale ahaan, marka laga reebo warqadda wakaaladda, oo la baahiyay ayadoo la racayo qodob sharci ah, haddii uusan si ka duwan wax u amrin.

**Qod. 13**

1. Qofka jeegga soo saaray wuxuu mas'uul ka yahay aqbalaadda iyo bixinta;
2. Qofka jeegga soo saaray wuxuu ka reebi karaa naftiisa masuuliyadda aqbalaadda. Qodob kasta oo uu kaga hadlayo inuu iska dhaafi waajibaadka bixinta, waa sidii iyada oo aan la qorin oo kale.

**Qod. 14**

1. Haddii kambiyaale, aan la dhameystirin markii la soo saaraayay, laakiin la dhammaystiro iyada oo la khilaafayo heshiisyada la galay, ilaalin la'aanta heshiisyadaas, laguma xiri karo sitaha, haddii uusan situhu ku iibsan kambiyaalaha si niyad xun, ama uu ku kaacay dayac culus markuu iibsanayay;
2. Sitaha kambiyaalaha wuxuu luminayaa xuquuqda uu ku buuxbuuxin karo kambiyaale cad

saddex sano ka dib laga soo bilaabo maalinta la soo saaray kambiyaalaha. Dhicitaankaas, laguma hor istaagi karo sitaha niyadda wanaagsan, kaasoo kambiyaalaha soo gaaray isaga oo dhameystiran.

## Cutubka 2aad

Wareejin

### Qod. 15

1. Kambiyaalaha, in kasta oo aan la caddeynin in si caadi ah loogu ganacsan karo, waxaa lagu wareejin karaa habka wareejinta;
2. Haddii qofka jeegga soo saaray uu ku daro kambiyaalaha ereyada ah "ma dalban" ama muuqaal u dhigma qoraalka farriinta, kambiyaalaha waxaa lagu wareejin karaa oo keliya qaababka iyo saameynta siismada caadiga ah;
3. Wareejintu sidoo kale waxaa loo sameyn karaa ayada oo loogu daneynaayo xataa qofka lagu magacaabay in uu u bixiyo (xitaa haddii uusan aqbalin) ama qofka jeegga soo saaray, ama qof kale oo uu ku waajibay.

Dadkaas waxay mar kale dib u celin karaan kambiyaalaha.

### Qod. 16

1. Wareejintu waa inay ahaato mid shuruud la'aan ah. Shardi kasta oo lagu xiro, waxuu noqoonayaa mid aan qornayn oo kale;
2. Wareejinta qaybta ah waa mid waxba kama jiraan ah;
3. Wareejinta qofka sitaha ah waxaa loo ictibaaraa mid sax ah.

### Qod. 17

1. Wareejintu waa in lagu dul qoraa kambiyaalaha ama warqad ku lifaaqan (dheereyn), waana inuu saxeexo wareejiyaha;
2. Wareejintu waxay noqoneysaa mid ansax ah, xitaa haddii ka-faa'iideystaha aan la soo sheegin ama wareejiyuhu uusan calaamad ka dhigin oo keliya saxiixa (wareejinta caddaanka ah). Xaaladdan oo kale, wareejinta si ay ansax ku noqoto waa inay ku qornaato kambiyaalaha gadaashiisa dambe ama fidinta.

### Qod. 18

1. Wareejintu waxay wareejinaysaa dhamaan xuquuqaha la xiriirro kambiyaalaha;
2. Haddii wareejintu ay tahay mid cad, qofka sitaha ah wuxuu awoodaa inuu:
   a) ku buuxiyo magaciisa ama qof kale magaciisa;
   b) inuu markale wareejiyo kambiyaalaha isaga oo cad;
   c) inuu kambiyaalaha u gudbiyo qof sadexaad, iyada oo aan la buuxin wareejinta cad iyo iyada oo aan la wareejin.

### Qod. 19

1. Wareejiyaha, haddii uusan jirin qodob ka soo horjeeda, ayaa mas'uul ka ah aqbalaadda iyo bixinta;
2. Isaga ayaa reebi karaa wareejin cusub; xaaladahaas, mas'uuliyad kama saarna kuwii kambiyaalaha mar kale loo wareejiyay.

**Qod. 20**

1. Haystaha kambiyaalaha waxaa loo arkaa inuu yahay sitaha sharciga ah, haddii uu xaqiisa ku cadeeyo wareejinno isxiga xataa haddii kan ugu dambeeyo uu yahay wareejin caddaan ama maran. Wareejinnada la tiritray waxaa loo ictibaaraya sidii ayada oo aan la qorin oo kale. Haddii wareejin maran ay raacdo wareejin kaloo maran, waxaa la rumeysan yahay in saxiixaha dambe ee kambiyaalaha in uu iibsaday kambiyaale ah, ayada oo ay sababtuna tahay wareejinta bannaan;
2. Haddii qofku lumiyo sabab kasta ha noqotee milkiyadda kambiyaalaha, sitaha cusub ee caddeeyo xuquuqdiisa sida waafaqsan qaababka lagu xusay faqradda hore looma baahna inuu soo celiyo, illaa haddii uu ku iibsaday niyad xun ama dayacaad uu ku kacay markuu iibsanaayay.

**Qod. 21**

Qofka lagu soo dacweeyay arrin la xiriirto kambiyaale kuma hor istaagi karo qofka kambiyaalaha sito waxyaabaha ka reeban oo ku saleysan xiriirka khaaska ah ee sitaha ama sitayaashii hore, marka laga reebo xaaladaha qofka sitaha, markuu uu gadanaayay, uu u dhaqmay si uu u waxyeeleeyo deynqabaha.

**Qod. 22**

1. Haddii marka la wareejinaayay lagu daray qodob ah “valuta per incasso”, “per incasso”, “per procura” ama qodob kale oo keeni karo amar, qofka sitaha ah wuxuu ku isticmaali karaa dhammaan xuquuqaha la xiriiro kambiyaalaha, haseyeehee ma warejin karo, wuxuuse ku wareejin karaa wakaalad;
2. Dadka khasabka ku ah, xaaladahan, isma hortaagi karaan sitaha, waxayse ku hor istaagi karaan oo keliya waxyaabaha uu ku hor istaagi karo Wareejiyuha;
3. Amarka ku dhex jiro hal wareejin ee wakaalad, ma ku dhamaaneyso geerida soodiraha ama karti darro ku timaado.

**Qod. 23**

1. Haddii marka la wareejinaayay lagu daray qodob ah “lacag qalaad ee damaanad”, “lacag qalaad ee rahan”. Ama qodob kale oo keeni karo rahan, sitihu wuxuu isticmaali karaa dhammaan xuquuqaha la xiriiro kambiyaalaha, haseyeeshee wareejinta isaga uu sameeyay waxay yeelaneysaa qiimo ah sida wareejin wakaalad oo keliya;
2. Dadka khasabka ku ah, isma hortaagi karaan sitaha waxyaabaha asaaska u ah xiriirkooda shaqsiga ah ee ay la leeyihiin wareejiyaha, marka laga reebo xaaladaha uu situhu, markuu helay kambiyaalaha kadib, u dhaqmo si uu u waxyeeleeyo deynqabaha.

**Qod. 24**

1. Wareejinta ka dambeysay dhicitaanka waxay dhalineysaa raadad la mid ah hal wareejin ee hore. Sidoo kale, wareejinta la sameeyay ashtako kadib ee ku saabsan bixin la’aan iyo kadib marka uu dhaco wakhtiga la qaadi lahaa ashtakada, waxay dhalineysaa oo kaliya raad dhiibid caadi ah;
2. Wareejin aan lahayn taariikh waxaa lo ictibaarayaa, ilaa caddeyn dambe, in la sameeyay ka hor dhamaanshaha wakhtiga loo xaddiday in ashtakada la soo jeediyo.

**Qod. 25**

1. Marka la bixiyo kambiyaale, oo ka dhashay hal wareejin oo la sameeyay ashtako kadib ee bixin la’aan ama kadib markuu dhamaado wakhtigii la keeni lahaa ashtakada ama ka dhashay qaraar gaar ah xataa haddii uu ka horeeyay dhicitaanka, waxaa u soo wareegayo qofka la siiyay

dhamaan xuquuqaha kambiyaalaha ee bixiyaha, haseyeeshee qofka la siiyay kambiyaalaha wuxuu hoos imaanayaa waxyaabaha lagu horjoogsan karo qofka bixiyaha ah;

2. Qofka bixiyaha ah xaq wuxuu u leeyahay ingacanta laga saaro kambiyaalaha.

**Cutubka 3aad**

Aqbqlaad

**Qod. 26**

Kambiyaalaha waxaa loo keeni karaa aqbalaadda qofka jeegga soo saaray oo ku aqbalayo degaankiisa, ha noqdo sitaha ama qof haysto ilaa dhicitaankiisa.

**Qod. 27**

1. Qofka jeegga soo saaray wuxuu ku qori karaa kambiyaalaha in loola yimaado aqbalaad muddo cayiman gudeheeda ama muddo cayiman la’aan;
2. Qofka jeegga soo saaray ayaa ku qori kara kambiyaalaha in marka loo soo bandhigaayo aqbalaadda in aysan dhicin kahor waqtiga loo cayimay;
3. Qofka jeegga soo saaray wuxuu kaloo xataa ku mamnnuuci karaa kambiyaalaha dushiisa in kambiyaalaha loola yimaado aqbalaad, haddii uusan ahayn mid lagu bixin karo qof sedexaad agtiisa ama meel ka duwan meesha uu degan yahay qofka lagu magacaabay in uu bixiyo ama uu ku tacluuqo wakhti mucayan ah;
4. wareejiye kasto wuxuu amri karaa in kambiyaalaha la keeno si loo aqbalo, asaga oo u xaddidayo ama aan u xaddideynin wakhti mucayan ah, marka laga reebo xaaladaha uu qofka jeegga soo saaray uu caddeeyo in aan la aqbali katin.

**Qod. 28**

1. Kambiyaalaha leh waqti mucayan oo aragti ah waa in aqbalaad loo keeno muddo hal sano ah gudaheeda marka laga soo bilaabo taariikhdiisa;
2. Qofka jeegga soo saaray wuxuu soo gaabin karaa wakhtigaas ama dheereyn karaa;
3. Muddooyinkaas waxaa soo gaabin karo wareejiyeyaasha.

**Qod. 29**

1. Qofka lagu magacaabay in uu bixiyo wuxuu codsan karaa soo jeedin labaad maalinta ku xigta tan koowaad: Dhinacyada daneynaya kama guuleysan karaan ka soo bixi la'aanta u hoggaansamida codsigan, haddii aan lagu xusin ashtakada,
2. Sitaha kuma khasbana inuu u keeno qofka lagu magacaabay in uu bixiyo kambiyaalaha ee loo soo bandhigay in la aqbalo.

**Qod. 30**

1. Aqbalaadda waxaa lagu qoraa kambiyaalaha, waana in ay lahaato erayga "la aqbalay", "la arkay" ama wax la mid ah; waxaana saxeexayo qofka lagu magacaabay in uu bixiyo. Saxiixa qofka lagu magacaabay in uu bixiyo ee ka muuqato wejiga hore ee kambiyaalaha wxay la mid tahay sida aqbalitaan oo kale;
2. Haddii kambiyaalaha lagu bixin karo waqti cayiman, ama, iyada oo loo cuskanayo qodob gaar ah, waa in loo soo bandhigaa aqbalaadda waqtiga loo qabtay, aqbalidda waa in ay lahaataa taariikhda maalinta la sameeyay, haddii uusan sitahu uusan dalbanin in lagu qoro taariikhda maalinta aqbalaadda loo soo bandhigay. Hadday taarikhdu maqan tahay, sitahu, si loo ilaaliyo

dib-u-dhaca ka dhanka ah wareejiyaha iyo kan ka dhanka ah qofka jeegga soo saaray, waa in uu hubsado maqnaanshaha asaga oo soo gudbinaayo ashtako waqti wanaagsan.

**Qod. 31**

1. Aqbalku waa inuu ahaadaa mid shuruud la'aan ah. Qofka lagu magacaabay in uu bixiyo wuxuu awoodaa, in uu ku xaddido qayb ka mid ah isugeynta lacagta;
2. Wax kabaddal kasta oo kale oo lagu sameeyo aqbalaadda marka loo eego kambiyaalaha wuxuu u dhigmaa diidmada aqbalaadda; Hase ahaatee, aqbalaha ayay wali ku waajib tahay marka loo eego aqbalaaddiisa.

**Qod. 32**

1. Haddii qofka jeegga soo saaray uu ku muujiyo kambiyaalaha meel lacag bixin oo ka duwan meesha uu degan yahay qofka lagu magacaabay in uu bixiyo laakiin aan ahayn qof saddexaad oo agtiisa lagu bixin doono, qofka lagu magacaabay in uu bixiyo wuxuu muujin karaa waqtiga aqbalaadda. Haddii tilmaantaas ay maqanaato, waxaa loo tixgelinayaa aqbaluhu in ay khasab ku tahay in uu ku bixiyo naftiisa meesha bixinta;
2. Haddii kambiyaaha uu yahay in lagu bixiyo deegaanka qofka lagu magacaabay in uu bixiyo, qofkan isaga ayaa tilmaami kara marka uu aqbalaayo isla meesha lacagta lagu bixinaayo.

**Qod. 33**

1. Marka la aqbalo, qofka lagu magacaabay in uu bixiyo wuxuu ballan qaadayaa inuu bixiyo lacagta kambiyaalaha marka muddadu dhamaato;
2. Haddii lacagta uu bixin waayo, situhu, xitaa haddii uu yahay qofka jeegga soo saaray, wuxuu ku leeyahay aqbaluhu, qaansheeg toos ah ee kambiyaalaha ah dhamaantood ee wax kasta oo la codsan karo si waafaqsan qodobbada 55 iyo 56;
3. Qofka lagu magacaabay in uu bixiyo ee oggolaado wuxuu sii ahaanayaa mid ay waajib ama khasab ku tahay, xitaa hadii uu iska indhatiro musalifnimada qofka jeegga soo saaray.

**Qod. 34**

1. Haddii aqbalaadda uu qofka lagu magacaabay in uu bixiyo ku qoray kambiyaalaha uu kansalo ka hor intuusan soo celin kambiyaalaha, aqbalitaanka waa sida ayada oo la diiday oo kale. Kansalidda ayaa loo qaddarinayaa in la sameeyey, illaa si kale loo caddeeyo mooyee, ka hor inta aan la soo celin kambiyaalaha;
2. Si kastaba ha noqotee, haddii qofka lagu magacaabay in uu bixiyo uu bixiyo ogeysiis aqbalaad oo qoraal ah uuna siiyo sitaha ama qof kasta oo saxiixe ah, isaga ayaa haya mas’uul ka ah dhanka aqbalaadda.

**Cutubka 4aad**

Ballanqaad Deynbixin

**Qod. 35**

1. Bixinta kambiyaalaha waxaa lagu sugi karaa ballanqaad bixinta qayb ama wadajirka lacagta;
2. Ballanqaadkan waxaa bixin kara qof saddexaad, ama xitaa sixiixaha kambiyaalaha.

**Qod. 36**

1. Taageeridda waxaa lagu qoraa kambiyaalaha iyo qoraalka dheerayntaba.

Waxaa lagu muujiyaa ereyada "oggolaansho" ama qaab kale oo la mid ah; waxaana saxiixa taageeraha;

2. Taageridda waxaa loo tixgaliyaa in la bixiyay oo kelia marka sixiixa taageeraha lagu qoro wajiga hore ee kambiyaalaha, waana inuusan ahayn saxiixa qofka lagu magacaabay in uu bixiyo ama qofka jeegga soo saaray;
3. Taageeridda waa in la muujiyo cidda la siiyay. Maqnaanshaha tilmaantan; waxaa loo ictibaarayaa in la siiyay qofka jeegga soo saaray.

**Qod. 37**

1. Taageeraha waxaa saaran waajib sida qofka taageerada la siiyay;
2. Waajibaadka taageeraha waa ansax xitaa haddii waajibka la dammaanad qaaday uu waxba kama jiraan uu yahay sabab kasta oo aan ka ahayn cillad dhanka qaabka ah;
3. Taageeraha ee bixiyo kambiyaalaha wuxuu helayaa xuquuqda la xiriirto oo ka soo horjeedda qofka la taageeray iyo kuwa kamboyaale ahaan ku waajibay dhanka qofka la taageeray.

**Cutubka 5aad**

Waqti-Dhicid

**Qod. 38**

1. Kambiyaalaha waxaa lagu qaadan karaa:
   a) aragtida;
   b) waqti cayiman ee arag;
   c) taariikh go'an;
   d) maalin go'an.
2. Kambiyaalaha ee taariikhaha dhicistoodu kala duwan ama ah kuwa ku xiga waa baa’ba.

**Qod. 39**

1. Kambiyaalaha aragtida ah waa la bixin karaa marka la soo bandhigo. Waana in lagu soo bandhigaa wakhtiga lacag bixinta muddo hal sano gudaheeda oo laga soo bilaabo taariikhda. Qofka jeegga soo saaray wuu soo gaabin karaa ama wuu kordhin karaa muddada. Muddooyinkaas waxaa soo gaabin karo wareejiyeyaasha;
2. Qofka jeegga soo saaray wuxuu go’aamin karaa in kambiyaale lagu bixin karo aragtida aan loo soo bandhigin in la bixiyo ka hor taariikh cayiman. Xaaladdan oo kale, muddada la soo bandhigaayo ayaa ka soo bilaabmayo maalintaas.

**Qod. 40**

1. Dhamaadka kambiyaalaha waqtiga cayiman waxaa lagu go'aamiyaa taariikhda la aqbalo ama waqtiga kambiyaalaha la bixin waayo;
2. Haddii ayna jirin waqti kambiyaalaha la bixin waayay, aqbalaadda aan la taariikheynin waxaa la arkaa inay tahay taariikhda, marka loo eegaayo aqbalaadda, maalinta u dambeyso ee taariikhda kama dambeysta ah ee loogu talo galay gudbinta aqbalaadda.

**Qod. 41**

1. Kambiyaalaha lagu qaadan karo taariikh hal bil ama bilo badan ama aragtida, wuxuu dhacayaa maalinta u dhiganta bisha ay tahay in la bixiyo. Haddii maalinta u dhiganto ay maqan tahay, kambiyaalaha wuxuu dhacayaa bisha ugu dambeeyso,
2. Haddii kambiyaalaha lagu qaadan karo hal bil ama bilo badan iyo badh oo taariikh iyo aragti ah, bilaha oo dhan waa la xisaabinayaa marka hore;
3. Haddii waqtiga kama-dambaysta ah la dejiyay bilowga, dhexda (bartamaha Janaayo, bartamaha Febraayo, iwm) ama dhamaadka bisha, kambiyaalaha wuxuu dhacayaa maalinta koowaad, shan iyo tobnaad ama maalinta ugu dambeysa bisha,
4. Ereyada "sideed maalmood" ama "shan iyo toban maalmood" macnaheedu ma ahan hal ama labo toddobaad, laakiin siddeed ama shan iyo toban maalmood oo dhab ah, oo ay ku jiraan ciidaha;
5. Ereyga "bil barkeed" macnaheedu waa ereyga shan iyo toban maalmood.

**Qod. 42**

1. Haddii kambiyaalaha lagu bixin karo maalin go'an meel jadwalkeeda uu ka duwan yahay kan meesha laga soo saarey, taariikhda loo qabtay dhicitaanka waxaa loo qaadanayaa in loo dejiyay sida waafaqsan jadwalka taariikhda meesha lagu bixinaayo;
2. Haddii kambiyaalaha lagu qaadanayo labo aag oo leh jadwallo kala duwan waxaa lagu bixin karaa maalin la hubo, waqtiga kama dambeysta ah waxaa lagu go’aaminaa iyadoo laga soo tirinayo maalinta, sida ku xusan jadwalka taariikhda meesha lacagta lagu bixinayo, waxay u dhigantaa maalinta la soo saaray,
3. Xilliga kama dambaysta ah ee keenista kambiyaalaha waxaa loo xisaabiyaa sida ku xusan faqradda labaad,
4. Qodobbada hore looma adeegsan karo haddii, qodob lagu muujiyey kambiayaalaha, ama xitaa haddii bayaannada kaliya ee kambiyaalaha ay ka muuqato ujeeddadu tahay in la qaato qodobbo kala duwan.

**Cutubka 6aad**

Lacag Bixinta

**Qod. 43**

1. Sitaha kambiyaalaha ee lagu bixiyo maalin go'an ama waqti cayiman waa inuu ku soo bandhigaa lacag bixinta maalinta la bixin doono, ama mid ka mid ah labada maalmood ee maalinshaqo oo ku xigtay;
2. Soo bandhigista kambiyaalaha ee qolka ganacsiga waxay u dhigantaa soo bandhigid lacag bixin.

**Qod. 44**

1. Kambiyaalaha waa in loo soo bandhigo lacag bixin goobta iyo cinwaanka lagu tilmaamay kambiyaalaha;
2. Marka cinwaankan maqan yahay, waa in loo soo gudbiyo lacag bixinta:
   a) Magaalada qofka lagu magaacabay in uu bixiyo, ama qofka lagu tilmaamay cinwaanka inuu magaciisa ku bixiyo;
   b) Aqbalaha degmadiisa oo aqbalay in uu wax ka qabto, ama dadka lagu tilmaamay cinwaanka inuu ku bixiyo;

c) degmada qofka la tilmaamay marka baahi ay jirto.

**Qod. 45**

1. Qofka lagu magacaabay in uu bixiyo kambiyaalaha wuu dalban karaa in lagu wareejiyo isaga rasiidka sitaha;
2. Situhu ma diidi karo lacag bixin qaar ah;
3. Marka qaar la bixiyo, qofka lagu magacaabay in uu bixiyo wuu dalban karaa in lagu xuso dusha kambiyaalaha lana siiyo rasiid.

**Qod. 46**

1. Sitaha kambiyaalaha looma baahna inuu helo lacag-bixinta kahor taariikhda loo qabtay;
2. Qofka lagu magacabay in uu bixiyo ee bixiyo kahor wakhtiga kamadambaysta ah isaga ayaa sidaas naftiisa ugu bareeray qatartana ku galay;
3. Qof kasta oo ku bixiyo lacagta taariikhda loo qabtay si sax ah ayaa loo sii daynayaa, haddii aysan jirin ula kac ama taxadar la'aan dhinaciisa ka timid. Waxaa looga baahan yahay inuu xaqiijiyo sii socoshada joogtada ee wareejinnada, laakiin ma aha inuu xaqiijiyo sax ahaanshaha saxiixyada wareejiyeyaasha.

**Qod. 47**

1. Haddii kambiyaalaha lagu bixiyo lacag aan ka soconin meesha lagu bixin lahaa, waxaa lagu bixin karaa lacagta dalka iyadoo loo eegayo qiimaheeda maalinta loo muddeeyay dhicitaanka. Haddii deynqabuhu uu soo daaho, situhu wuxuu dooran karaa in uu weydiisto in wadarta lacagta lagu bixiyo ay noqoto lacagta waddanka, sida ku xusan qiimaha maalinta uu dhacayo ama maalinta la bixinaayo;
2. Qiimaha lacagta qalaad waxaa lagu go'aamiyaa adeegsiga dhaqanka goobta lacag bixinta. Qofka jeegga soo saaro wuxuu caddayn karaa in lacagta la bixinayo loo xisaabiyo iyadoo loo eegayo qiimaha ku qoran kambiyaalaha;
3. Qodobbada hore lama adeegsan karo haddii qofka jeegga soo saaro uu cayimay in lacag bixintu lagu sameeyo lacag si gaar ah loo tilmaamay (qodobka wax ku oolka ah ee lacagta ajanabiga ah);
4. Haddii lacagta lagu muujiyay lacag leh isla magac isku mid ah laakiin leh qiime ka duwan tan dalka laga bixiyay iyo tan dalka lacagta lagu bixinaayo, tilmaanta waxaa loo qaadanayaa in loola jeedo lacagta meesha lagu bixinaayo.

**Qod. 48**

1. Haddii kambiyaalaha aan loo soo bandhigin lacagbixin muddada lagu cayimay qodobka 43aad, deynqabe kasta wuxuu awood u leeyahay inuu u soo shubo wadarta lacagta hay'adda awoodda u leh, asaga oo bixinayo kharashka, qaadanayana halista iyo khatarta sitaha kambiyaalaha;
2. Kambiyaalaha lagu bixin karo Dawladda, Hay'adda awoodda u leh inay hesho deebaajiga waa Hey’adda soo saarto.

**Cutubka 7aad**

Dibudhac

**Qod. 49**

Dacwadda kambiyaalaha waa “toos” ama “dibudhac”. Waa toos, markay ka dhan tahay aqbalaha iyo taageerayaashiisa; ama dib u dhicid oo loola jeedo marka qof kastoo kale oo ka dhan ah wax ku waajibay.

**Qod. 50**

Situhu wuxuu weydiisan karaa xaqa dibudhac ee ka dhanka ah wareejiyaasha, qofka kambiyaalaha soo saaray iyo dadka kaloo wax ku waajibay:

A) marka uu waqtiga uu dhaco, haddii lacag-bixinta aysan dhicin;
B) xitaa kahor waqtiga kama dambaysta ah,
  a) haddii aqbalaadda la diiday dhammaan ama qayb ahaan;
  b) haddii ay dhacdo in uu musalaf noqdo qofka lagu magacaabay in uu soo saaro, ha ogolaado ama yuusan ogolaanine; ama joojinta lacag bixinta ee isla qofka, xitaa haddii aan lagu cadeynin xukun; ama markale, fulin aan lagu guuleysan oo lagu qaado hantidiisa;
  c) haddii ay dhacdo in uu musalafo qofka soo saaray kambiyaale aan la aqbali karin.

**Qod. 51**

1. Diidmada aqbalaada ama lacag bixinta waa inay noqotaa mid lagu caddeeyay ashtako qoraal ah in la bixin waayay kambiyaalaha;
2. Ashtakada diidmada aqbalaadda waa in la keeno waqtiga loo qabtay in la soo gudbiyo aqbalaadda. Haddii soo bandhigidda hore, sida xaaladda ku xusan faqradda koowaad ee qodobka 29, la sameeyay maalinta ugu dambeyso ee muddada, ashtaka waa in la keeno xataa maalinta ku xigto;
3. Ashtakada diidmada aqbalaada ee bixin la'aanta kambiyaalaha la bixin karo maalin go'an ama waqti la siiyay ama taariikh la hubo waa in la keeno mid ka mid ah labada maalmood ee maalmaha shaqada ee xigo maalinta ay tahay in kambiyaalaha la bixiyo. Haddii kambiyaalaha uu yahay mid aragtida lagu bixinayo, kambiyaalaha la bixin waayay waa in la keeno sida waafaqsan faqradaha kor ku xusan, ee la xiriirto diidmada aqbalid la’aanta;
4. Ashtakada diidmada aqbalid la’aanta waxay ka dhaafeysaa soo bandhigidda ee bixinta iyo ashtakada bixin la’aanta;
5. Haddii ay dhacdo in qofka lagu magacaabay in uu soo saaro laga joojiyo lacag bixinta, ha aqbalo ama yuusan aqbalinine, ama xaaladaha fulin aan lagu guuleysan lagu sameeyo hantidiisa, sitaha ma isticmaali karo xuquuqda dib u celinta kadib markii uu u soo bandhigay kambiyaalaha qofka lagu magacaabay in uu bixiyo iyo kadib markii uu soo gudbiyay kambiyaalaha in la bixinwaayay;
6. Haddii ay dhacdo musalafnimada qofka lagu magacaabay in uu bixiyo, ha aqbalo ama yuusan aqbaline, iyo haddii ay dhacdo in uu musallafo qofka kambiyaalaha soo saaray aan la aqbali karin, soo saarista xukunka cadeynaayo musalifnimada ayaa ku filan sitaha si uu u isticmaalo xuquuqda dib u soo celinta.

**Qod. 52**

1. Sitihu waa inuu ogeysiiyaa qofka u soo wareejiyay iyo qofka jiidaya qofka kambiyaalaha soo saaray aqbalaad la'aanta afar maalmood gudahood ee maalmaha shaqada ee xiga maalinta kambiyaalaha la fulin waayay, ama maalinta lasoo bandhigay haddii ay ku jirto kambiyaalaha qodobka "lacag la'aan".
Wareejiye kasta, labada maalmood ee shaqo ee ku xigta maalinta uu helay ogeysiiska waa inuu ogeysiiyo wareejiyaha ka horeeyay ogeysiiska
la helay, isaga oo ku muujinayo magacyada iyo cinwaannada kuwa siiyay digniinadii horeeyay, iyo wixii la mid ah, ilaa laga gaaro qofka kambiyaalaha soo saaray shuruudaha kor lagu soo sheegay waxay ka bilaabanayaan helitaanka ogeysiiska hore.
2. Haddii, sida waafaqsan faqradda hore, ogeysiiska la siiyo hal saxiixe
ee kambiyaalaha, ogeysiis la mid ahna waa in la siiyo, isla muddadaasna dhexdeeda xataa taageeraha;
3. Hadduu hal wareejiye uusan muujinin cinwaankiisa, ama uu muujiyey
qaab aan la akhrin karin, waxaa ku filan in ogeysiiska la siiyo wareejiyaha ka horeeyo;
4. Qof kasta oo laga doonayo inuu ogeysiis bixiyo wuxuu ku bixin karaa nooc kasta, xitaa dib u dhigista fudud ee kambiyaalaha;
5. Waa inuu caddeeyo inuu ku wargaliyo ogeysiiska waqtiga loo qabtay.
Waqtiga kama dambaysta ah waxaa loo qaddariyo in la ixtiraamay, haddii warqad ay ku jirto ogeysiiska lagu soo diray boostada waqtiga loo qabtay;
6. Qofkii ogeysiiska aan ku bixinin muddada aan kor soo sheegnay dib ugama soo noqdo dib-u-dhacaas; si kastaba ha noqotee wuxuu mas'uul ka yahay dayacaaddiisa haddii ay sababtay waxyeelo uu geestay, waa in lacagta magdhowga aysan dhaafin tan kambiyaalaha.

**Qod. 53**

1. Qofka kambiyaalaha soo saaray, wareejiyaha ama damiintaha wuxuu, ayadoo la
eeggaayo qodobka oo leh «waa lacag la'aan» ama qodob kale oo u dhigma, oo lagu qoray kambiyaalaha lana saxiixay, ka sii dayn karaa sitaha kambiyaale la bixin waayi oo ay sabab u tahay guuldarrada aqbalaad la'aanta ama lacag-bixin la'anta, si uu u isticmaalo xaqa uu u leeyahay soo-celinta;
2. Qodabkani kama sii deyn doono sitaha in uu ku keeno kambiyaalaha muddada ballanta gudaheeda, ama ogeysiisyada. Caddaynta in lagu guuldaraystay u hoggaansanaanta shuruudaha waxaa laga rabaa qofka ka soo horjeedo sitaha;
3. Haddii qofka kambiyaalaha soo saaray uu ku daray qodobka, wuxuu saameyn ku yeelanayaa dhanka dhammaan saxiixayaasha; haddii uu ku daray hal wareejiye ama hal taageere, wuxuu saameyn ku yeelanayaa, marka loo eego, kan oo kaliya. Haddii qofka kambiyaalaha soo saaray uu ku daray qodob, sitahana uu ku soo ashtakooday in kambiyaalaha la bixin waayi, wuxuu noqonayaa kharashaadka dushiisa. Haddii qodobka uu ku daray hal wareejiye ama hal damiinte, kharashaadka la xiriiro ashtakada in kambiyaalaha la bixin waayay, haddii la soo sheego, waxaa la weydiisan karaa dhamaan saxiixayaasha.

**Qod. 54**

1. Qofka kambiyaale soo saaray, aqbaly, wareejiyey iyo damiintay kambiyaalaha waxay si wadajir ah uga jawaabayaan sitaha hortiisa;
2. Sitaha wuxuu xaq u leeyahay in uu dacweeyo dadkan qof qof ama wadajir ahaan: kuma qasbana in uu dhowro sida ay ugu kala horeeyeen waajibaadka;

3. Isla xuquuqdaas oo kale waxaa iska leh qof kastoo saxiixay ee bixiyay lacagta kambiyaalaha;

4. Dacwada lagu soo furay mid ka mid ah kuwa uu ku waajibay kama reebeyso in kuwa kalena uu dacweeyo, xataa haddii kuwan ay ka dambeeyaan kan marka hore la soo dacweeyay.

**Qod. 55**

1. Sitaha wuxuu ku dalban karaa habka ama nidaamka dibudhaca:
   a) lacagta kambiyaalaha ee aan la aqbalin ama aan la bixin iyo dulsaarkooda, haddii la cayimay;
   b) dulsaarka, marka laga soo bilaabo waqtiga kama dambeysta ah, si siman oo la mid ah sida kambiyaalaha ku qoran ee ku cad qod. 5, ama haddii uu maqan yahay, saami sharci ah;
   c) Kharashka ashtakada ah, ogeysiisyada la siiyay iyo kharashyada kale.
2. Haddii dibudhicis la adeegsado waqtiga kama dambaysta ah kahor, waxaa laga goyn doonaa sicir dhimis ee lacagta kambiyaalaha. Sicir-dhimista waxaa loo xisaabiyaa iyada oo lagu saleynayo sicirka rasmiga ah ee Bangiga soo saaray laga soo bilaabo taariikhda xuquuqda dib u celinta, meesha uu deggan yahay sitaha kambiyaalaha.

**Qod. 56**

Qofka bixiyay lacagta kambiyaalaha wuxuu weydiisan karaa wareejiyeyaashooda:

a) wadarta guud ee la bixiyay;
b) dulsaarka lacagta, si la mid ah sida lagu tilmaamay kambiyaalaha sida waafaqsan qod. 5, ama haddii canshuurta sharciga maqan tahay, waxay ka soo bilaabaneysaa maalinta sharciga uu amray;
c) Kharashyada ku baxay.

**Qod. 57**

1. Qof kasta oo ay wax ku waajibeen oo lagu oogay ama laga yaabo in lagu soo oogo dibudhicis, wuxuu dalban karaa, oo ka soo horjeedo bixinta, in gacanta laga saaro kambiyaalaha la bixin waayay iyo xisaabta rasiid soo celinta;
2. Wareejiye kasta oo bixiyay kambiyaalaha wuu burin karaa wareejintiisa iyo wareejinta kuwa kuxiga ee dambe.

**Qod. 58**

Haddii dibudhicis laga helo qaar ka mid ah aqbalaadda ka dib, qofkii bixiyo wadarta lacag aan kambyaaleheeda la oggolaanin, wuxuu warsan karaa in lacagtaas la bixiyay lagu xuso kambiyaalaha lana siiyo rasiid. Sitahu wuxuu sidoo kale siin karaa nuqul la mid ah kambiyaalaha iyo nuqul in kambiyaalaha la bixin waayay, si ay ugu suurta gasho inuu sameeyo tillaabo dheeri ah ee dibudhicis.

**Qod. 59**

1. Qof kasta oo xaq u leh inuu adeegsado xuquuqda dibudhicista wuxuu, haddii ayne jirin qodob ka soo horjeedo, dib ugu soo ceshan karaa kambiyaale cusub (dib u soo celin), iyadoo la adeegsan karo mid ka mid ah dammaanad-qaadayaashiisa iyo in lagu bixiyo halka u ah hoygiisa;
2. Dib u soo cesashada waxaa ka mid ah, ka sokow lacagta ku xusan qodobbada kala ah 55 iyo 56, khidmada guddiga iyo waajibaadka shaambada ee soocelinta;
3. Haddii dib u soo cesashada laga qaado sitaha, qadarka lacagta waxaa lagu xaddidayaa

iyadoo loo eegayo inta lagu xaddido kambiyaale aragti ah, oo laga soo bixiyay goobta kambiyaalaha asalka ah lagu bixin karay oo ah halka degaanka u ah dammaanad qaadaha. Haddii dib u soo cesashada laga qaado wareejiye, qaddarka lacagta waxaa lagu xaddidayaa ayadoo loo eegayo inta lagu xaddido kambiyaale aragti ah, oo laga soo bixiyay goobta qofka kambiyaalaha dib u soo cesashada soo saaray uu ku leeyahay degaan uu ku leeyahay degaanka damiintaha.

**Qod. 60**

1. Dhamaashaha shuruudahii la go'aamiyay:
   a) si loo soo bandhigo, marka laga hadlaayo kambiyaale aragti ah ama kambiyaale waqti go'an oo aragti ah, ama kambiyaale leh qodobka "lacag la'aan";
   b) si looga ashtakooda kambiyaale aan la bixin, si kastoo ay tahayba; way dheceysaa xuquuqda sitaha uu ku leeyahay qofka jeegga soo saaray iyo wixii kale oo wax ku waajibay, marka laga reebo qofka jeegga soo saaray.
2. Haddii kambiyaalaha aan loo soo bandhigin aqbalaad muddadii uu u cayimay qofka jeegga soo saaray, situhu way ka dheceysaa xuquuqda dib u soo cesashada ha noqoto lacag bixin la'aan ama oggolaasho la'aan, marka laga reebo in ay ka muuqato nuxurka kambiyaalaha in qofka jeegga soo saaray uu ugu talagalay inuu iska dhaafo oo keliya dammaanadda aqbalaadda;
3. Haddii hal wareejin lagu cayimo taariikh go'an in lagu soo gudbiyo, wareejiyaha kaliya ayaa isticmaali karo.

**Qod. 61**

1. Haddii caqabad aan laga gudbi karin (qodobka sharciga ah ama kiis kale oo ka awood sareeyo) ay ka hor istaagto in kambiyaalaha uu soo bandhigo ama uu keeno ashtako iyadoo la raacayo shuruudaha loo cayimay, kuwan waa la dib dhigi karaa;
2. Sitaha waxaa waajib ku ah inuu ogeysiiyo, si aan daahid lahayn, xaaladaha ay jirto awood ka xoog badan, wareejiyihii ugu horeeyay; iyo inuu ku qoro, kambiyaalaha dushiisa ama qaybta lagu dheereeyay, ogeysiiska taariikheeyo saxiixana. Inta hartay, waxaa lagu dabaqayaa amarrada qodobka 52;
3. Markuu xooggan ka weyn uu joogsado, situhu waa inuu si dhakhso leh u soo gudbiyo kambiyaalaha si loo aqbalo ama lacag bixinta, ama haddii loo baahdana, loo qaado tallaabo ashtako;
4. Hadday awoodda ka xooog badan ay sii socoto in ka badan soddon maalmood laga bilaabo maalinta kama dambaysta ah, xuquuqda dib u ceshashada waa la isticmaali karaa iyadoon loo baahan soo bandhigid iyo ashtako;
5. Kambiyaalaha aragga ama waqtiga cayiman, muddada soddonka maalmood ah waxay ka bilaabmaysaa taariikhda qofka sitaha ah, xitaa ka hor inta uusan dhicin waqtiga kama dambeysta ah ee soo gudbinta, uuna siiyo ogeysiis awooddan ka xoogga badan, wareejiyaha hore; kambiyaalaha aragtida waqtiga cayiman, waqtiga soddonka maalmood ah waxaa lagu daraa dhamaadka aragtida oo lagu muujiyo kambiyaalaha dushiisa;
6. Looma tixgeliyo xaaladaha ay jirto awoodda xoogga badan xaqiiqooyinka shaqsiga ee sitaha kambiyaalaha ama uu isaga u xilsaartay in uu u soo bandhigo kambiyaalaha ama keeno ashtakako.

**Qod. 62**

In badan oo ka mid ah kuwa uu wax ku waajibay qaatayna hal mawqif oo isku mid ah ee kambiyaalaha ah ma dhacayso in tallaabo laga qaado, iyo in lagu nidaamiyo xiriirka xeerarka la xiriiro waajibaadyada badan ee wadajiro.

**Qod. 63**

1. Kambiyaalaha wuxuu leeyahay saamayn fulineed ah oo lagu fulinaayo hantida iyo waxyaabaha soo raaco, sida waafaqsan qodobbada 55, 56 iyo 59;
2. Kambiyaalaha dibadda laga soo saaray waxay saameyntiisu la mid tahay sida isla saameynta ay kuwan leeyihiin, waayo waxaa oggol sharciga meesha kambiyaalaha laga soo saaray.

**Qod. 64**

Duristu ma joojinayso fulinta; laakiin Guddoomiyaha Maxkamadda awoodda u leh, marka uu u keeno rafcaan qofka ka soo hor jeeda ee aan aqoonsanayn saxiixiisa ama wakiil ama sababo dhab ah oo sabab sal adag leh, wuxuu, kadib markii go’aan sababeysan oo aan wax culaabineynin, baaro dokumentiyada loo soo gudbiyay, hakin karaa gebi ahaan ama qeyb ahaan go’aannada fulinta, asaga oo dhigaayo rahan ku habboon.

**Qod. 65**

1. Dacwooyinka kambiyaalaha la xiriiro, deynqabuhu wuxuu ku horjoogsan karaa oo kaliya ka reebista baaba’a ee kambiyaalaha iyadoo la raacayo xadka qod. 2, iyo kuwa qod. 21 uusan mamnuucaynin;
2. Haddii waxyaabaha ka reeban ay yihiin kuwo u baahan baaritaan dheer, xaakinka, kadib codsiga ama bixiyaha, waa inuu soo saaro xukun ku meel gaar ah oo wata ama aan wadanin dammaanad lacageed. Waxa kale oo uu siin karaa, kadib markii deynqabaha uu soo weyddiisto, marka ay jirto sabab culus, in la joojiyo fulinta, oo la soo rogo, haddii uu u arko inay munaasib tahay, dammaanad ku habboon;
3. Haddii jojinta mar hore lagu siiyay sida waafaqsan qodobka hore lagu muujiyey, Garsooraha asaga oo sii wado xukunku wuxuu go'aamiyaa xaqiijinta ama ka noqoshada go’aanka.

**Qod. 66**

1. Haddii xiriirka sababta u noqday in la soo saaro ama la soo gudbiyo kambiyaalaha uu ka dhasho dacwo, xiriirkaasi waa ay jireysaa, inkasta oo la soo saaray ama la soo gudbiyay kambiyaalaha, marka laga reebo in la caddeeyo in uu jiray wax cusub;
2. Dacwadaas waxaa la isticmaali karaa oo kaliya kadib marka lagu xaqiijiyo ashtako ah in la aqbali waayay ama la bixin waayay lacagta;
3. Situhu ma sameyn karo dacwo sababa oo aan ka ahayn in uu u ballan qaado deyn qabaha inuu u soo celinaayo kambiyaalaha, iyo in uu dhigo Xafiiska kaaliyaha Garsooraha awoodda u leh, bishardi in uu buuxiyo shuruudaha lagama maarmaanka u ah in deynqabaha laftiisa uu xafido xaqa uu u leeyahay dib u soo cesashada isaga khuseyso.

**Qod. 67**

Haddii sitaha uu lumiyay dacwadda kambiyaalaha ee liddiga ku ah kuwa ay wax ku waajibeen, uusanna ku lahayn wax tallaabo ah oo ka dhan ah iyaga wuxuu dacweyn karaa qofka jeegga soo saaray ama aqballaha ama wareejiyaha iibiyaha wadarta qiimaha lacagta naftooda si aan caddaalad aheen oo xaqdarro ahna waxna u dhimayo.

**Qod. 68**

1. Ashtakadu waa in uu u sameeyo, kuna sameeyo hal ficil oo kaliya: Nootaaye ama sarkaal garsoorka ka tirsan;

2. Degmooyinka dawladahooda hoose oo aan lahayn nootaayo ama sarkaal garsoorka ka tirsan, ashtakada waxaa soo saari karo Xoghayaha Dawladda Hoose ee Degmada;

3. Looma baahna caawimaad markhaatiyaal si loo saaro ama loo sameeyo ashtakada.

**Qod. 69**

1. Ashtakadu waxaa lagu sameyn karaa qoraal gaar ah, ama waxaa lagu qori karaa kambiyaalaha dushiisa ama dusha nuqulka rasmiga ah ee kambiyaalaha ama koobigiisa, ama xaashida lagu dheereeyay. Xaashida lagu dheereeyay waa lagu dari karaa warqad nootaayo ama warqad maxkamadeed ama Xoghaya Dawladda Hoose, kuwaas oo ay tahay inay iyagu markasto shaabadeeyaan meelaha ay warqadaha isaga dhegan yihiin.

2. Haddii hakintu mar hore lasiiyay sida waafaqsan qodobka hore, garsooraha oo sugayo xukunka, wuxuu go'aan ka gaarayaa in uu xaqiijiyo ama la noqodo go'aanka.

**Qod. 70**

1. Ashtakadu waa in lagu sameeyo meelaha ku tilmaaman qod. 44, laguna sameeyo shaqsiyaadka lagu kala muujiyay, xitaa haddii aysan joogin;

2. Haddii dadkaan aan laga raadin karin hoygooda, ashtakadu waxaa lagu samayn karaa goob kasta oo lacagta lagu bixinaayo, waxayse ku xiran tahay hadba doorashada qofka dacwoonaayo;

3. Awood la'aanta dadka ay tahay in ay soo bandhigaan kambiyaalaha, kama reebeyso waajibka ka saaran in ay dacwad ka keenaan dadka ka soo horjeedo, marka laga reebo sida lagu sheegay faqradda u dambeeyso ee qod. 51;

4. Haddii qofka ay tahay in loo soo bandhigo kambiyaalaha uu geeriyoodo, ashtakada kambiyaalaha waxaa sidoo kale lagu wadayaa magaciisa sida waafaqsan nidaamyada hore.

**Qod. 71**

1. Ashtakadu waa iney ka koobnaato:
   a) taariikhda;
   b) Magaca codsadaha;
   c) Tilmaanta meelaha laga sameeyay, iyo in lagu xuso baarista lagu sameeyay sida waafqasan qod. 44;
   d) Mawduuca codsiyada, magacyada dadka, jawaabahooda ama sababaha aysan u jirin;
   e) Saxiixa nootaayada, ama sarkaalka garsoorka, ama xog hayaha Dawladda Hoose.

2. Ashtakada lagu sameeyo warqad gaar ahaaneed waa inuu kujiraa qoraalka kambiyaalaha;

3. Si isla qofka uu u bixiyo kambiyaaleyaal badan kuna bixiyo isla goobta, deyn bixiyuhu wuxuu ku keeni karaa hal ashtako.

**Qod. 72**

1. Hadduusan qofka kambiyaalaha soo saaray ku qorin kambiyaalaha dushiisa wajibka uu ka ashtakoonaayo, tan waxaa lagu beddeli karaa, haddii uu situhu oggol yahay, caddeynta diidmada aqbalaada ama bixinta, oo ku qoran kuna taariikhaysan kambiyaalaha ama xaashida dheereynta lacagta ama warqad gaar ah, oo uu saxeexay qofka lagu magacaabay in uu bixiyo;

2. Cadeyntaas, si loo helo saameynta ashtakadu, waa in la diiwaan geliyo muddada ashtakada;

3. Xaaladaha ku xusan faqradda koowaad, wareejinta aan lahayn taariikh waxaa loo malaynayaa in la sameeyey caddeynta kahor.

**Qod. 73**

1. Notaayooyinka, saraakiisha garsoorka iyo Xoghayaasha Dawlada Hoose waa in ay ku qoraan diiwaanka, dacwooyinka, ayagoo ku tilmaamayo shuruudaha ku xusan qodobbada hore, maalin walbaba iyo sida ay u kala horeyso taariikhdooda;
2. Nuqulka asalka ah ee ashtakadu oo lagu qoray warqad gaar ah waa in loo geeyo sitaha kambiyaalaha.

**Cutubka 8aad**
Soo Dhexgalka

**Qaybta 1aad**
Qodobbo guud

**Qod. 74**

1. Qofka kambiyaalaha soo saaray, wareejiyaha ama dammaanad qaadaha waxay tilmaami karaan hal qof inuu u aqbalo ama bixiyo waqtiga loo baahan yahay;
2. Kambiyaalaha wuxuu, ayadoo la raacayo shuruudaha hoos ku qoran, la aqbali karaa ama waxaa bixin karo qof soo dhex galo waxkastoo waajib ah jidka dib ugu noqda;
3. Dhex-dhexaadiyuhu wuxuu noqon karaa qof saddexaad, isla qofka lagu magacaabay in uu bixiyo naftiisa, ama qof horeba waajib kambiyaale lagu lahaa, aqbalaha mooyee;
4. Dhex-dhexaadiyuhu waa inuu, labada maalmood ee shaqo ee ku xigta faragelinta, siiyaa ogeysiis qofka soo dhexgalay. Haddii ay dhacdo in uu u hoggaansami waayo muddadaas, isaga ayaa mas'uul ka ah haddii taxaddar la'aantiisa ay waxyeello ka dhalatay, iyada oo qaddarka magdhowgu uusan ka badnaan karin lacagta kambiyaaalaha.

**Qaybta 2aad**
Aqbalaadda faragelinta

**Qod. 75**

1. Aqbalaadda faragalinta waxaa la samayn karaa markasta oo sitaha kambiyaale la aqbali karo uu ku isticmaali karo dib u dhigid kahor waqtiga loo qabtay;
2. Haddii kambiyaalaha dushiisa lagu muujiyo qof inuu aqbalo ama ku bixiyo meesha lacag bixinta, situhu maku isticmaali karo xaqa u uu leeyahay in uu dib uga soo ceshado kahor taariikhda kama dambaysta ah qofkii ku muujiyay tilmaantaas iyo saxeexayaasha ku xigo, haddii isaga uusan u soo bandhigin kambiyaalaha qofka la tilmaamay iyo, diidmada qofkan uu diido in uu aqbalo, diidmada in loo arko ashtako;
3. Xaaladaha kale ee farageliineed, situhu ama qofka la tilmaamay waa uu diidi karaa aqbalaadda faragelinta. Si kastaba ha noqotee, haddii uu qirto, wuxuu luminayaa xuquuqdiisa ah in uu dacwoodo ka hor waqtiga kama dambaysta ah ee habka dib loogu soo celinayo oo ka dhanka ah qofka loo oggolaaday iyo saxiixayaasha ku xiga.

**Qod. 76**

Ogolaanshaha faragalinta waxaa lagu qoraa kambiyaalaha, waxaana saxiixo soo dhexgalaha. Waxayna muujineysaa cidda la siiyay; haddii ay tilmaantu maqan tahay, aqbalaadda waxaa loo qaadanayaa in la siiyay qofka kmbiyaalaha soo saaray.

**Qod. 77**

1. Qofka aqbalay in uu soo dhexgalo wuxuu masuul ka yahay sitaha iyo wareejiyeyaasha is

xigxigo ee qofka dartiisa uu soo dhexgalay, si la mid ah kan;

2. Inkastoo la aqbalay soo dhexgelidda, qofka dartiisa loo siiyay iyo wareejiyeyaashaba, waxay weydiisan karaan sitaha, dib u soo celinta lacagta ku cad qod. 55, dhiibista kambiyaalaha, keenista ashtakada iyo rasiidka xisaab celinta, haddii xaaladdu sidaas tahay;

3. Haddii kambiyaalaha aan loo soo bandhigin aqbalaha si uu soo dhexgalo kama dambeys maalinta ku xigta maalinta ugu dambeyso ee la oggol yahay in meesha laga saaro ashtakada laga ashtakoonayo lacag bixin la' aanta, waajibaadka qofka aqbalay in uu soo farageliyo waa ay baa'baeysaa.

## Qaybta 3aad

Soo Dhexgelid si Lacag loo Bixiyo

### Qod. 78

1. Soo dhexgelidda keeneyso lacag bixin ayaa la samayn karaa markasta oo situhu uu adeegsan karo markay dhacdo xuquuqda soo celinta, ama dhicitaanka kahor;
2. Lacag bixintu waa inay kujirtaa wadarta lacagta ay tahay in uu bixiyo qofka soo dhexgeliddu u dhacday;
3. Waana in la sameeyo ugu dambayn maalinta ku xigta maalinta u dambayso ee loo oggol yahay in uu keeno ashtakada laga ashtakoonay lacag bixin la'aanta;
4. Soo dhexgelidda keeneyso lacag bixin waa inay ka dhalataa ashtakada; iyo, haddii tan mar hore la keenay, waa in uu ku muujiyo sarkaalka dadweynaha ee soo bilaabay sii wadid ashtako. Kharashka dacwada ashtakada ah waa la celin karaa, xitaa haddii qofka kambiyaalaha soo saaray uu ku qoray qodobka "bilaa lacag" kambiyaalaha.

### Qod. 79

1. Haddii kambiyaalaha ay aqbaleen dhex-dhexaadiyeyaasha oo iyagu ku leh hoy goobta lacag bixinta, ama haddii lagu muujiyey dad guryo ku leh meeshaas inay iyagu bixiyaan marka looga baahdo, situhu waa in uu u keeno kambiyaalaha dadkan oo dhan iyo, haddii loo baahdo, uu keeno cabasho bixin la'aan kambiyaalaha ugu dambayn maalinta ka dambaysa maalinta ugu dambaysa ee la oggol yahay in la keeno ashtakada;
2. Haddii ashtakada aan lagu keenin muddadan gudaheeda, qofkii ku qoray tilmaanta baahida ama sababtiisa kambiyaalaha lagu aqbalay, iyo wareejiyeyaasha isku xigxigo waa la sii daynaa.

### Qod. 80

Sitaha oo diido lacag bixinta ee soo dhexgelidda ah wuxuu luminaya dib u dhaca ku yimaado kuwa la sii deyn lahaa.

### Qod. 81

1. Lacag bixinta ee soo dhexgelidda waa in lagu bixiyo rasiid kambiyaalaha dushiisa ayada oo lagu muujinaayo cidda loo sameeyey. Haddii muujintaas ay maqan tahay, lacag bixinta waxaa loo qaadanayaa in loo sameeyay qofka kambiyaalaha soo saaray;
2. Kambiyaalaha iyo ashtakadaba, haddii la soo gudbiyo, waa in gacanta laga saaro qofka soo dhexgelidda ku bixiyo lacagta.

### Qod. 82

1. Qofka ku bixiyo lacagta soo dhexgelid darteed wuxuu helayaa xuquuqda la xiriirto

kambiyaalaha dhanna ka ah qofkii bixiyay iyo kuwa kambiyaale ahaan waajib ku ah dhanka kan dambe oo ah kii bixiyay, laakiin ma wareejin karo mar labaad kambiyaalaha;

2. Wareejiyeyaasha isxigxigo ee daba socdo qofka wajibaadka saaran oo dartiisa loo sameeyay lacag bixinta waa la sii dayanaa;

3. Haddii dad badani ay isu soo qaddimaan lacag bixinta soo dhexgeliddeeda, waxaa mudnaanta la siinayaa qofka lacagtiisa ay xureyneyso tirada ugu badan ee dadka waajibka saaran.

Qofkii si ula kac ah u soo dhexgalo si ka duwanna uga horyimaado qodobkan wuxuu luminayaa awoodda sidii uu dib ugula soo noqoshadiisa kuwa la xoreeyay.

## Cutubka 9aad

Nuqul iyo Koobi ka Sameyn

### Qaybta 1aad

Nuqullada

#### Qod. 83

1. Kambiyaalaha wuxuu noqon karaa lacag bixin waxaana laga sameyn karaa dhowr nuqul oo isku mid ah;
2. Nuqullada waa in lagu dhex lambareeyo kambiyaale walba; haddii taas lagu guuldareysto, waxaa loo tixgelinayaa sida kambiyaleyaal kala duwan;
3. Qofka sitaha ah wuxuu weydiisan karaa in laga sameeyo nuqullo asaga oo bixinaayo kharashka, haddii aysan ka muuqan kambiyaalaha intaas in loola dhaqmo sidii wax looga beddelanayo oo kale. Saas darteed, waa inuu isla markaaba uu u leexdo wareejiyihiisa, sidaasna uu ku socdo ilaa uu ka gaaro qofka jiidayo. Wareejiyeyaashana waxaa looga baahan yahay inay ku qoraan wareejinta nuqullada dushooda.

#### Qod. 84

1. Lacagta lagu bixiyo hal nuqul wax bey xorayneysaa, xitaa haddii aan lagu dhawaaqin in lacagbixintani ay tirtireyso saameynta nuqullada kale.

Qofka lagu magacaabay in uu bixiyo waa uu ku khasbanaanayaa nuqul kasta oo la aqbalo ee aan la soo celin;

2. Wareejiyaha nuqullada uu u wareejiyo dad kaloo kala duwan, iyo wareejiyeyaal isxigxigo, waxay dhammaantood ku qasban yihiin nuqullada wato saxiixooda oo aan dib loo soo celin.

#### Qod. 85

1. Qofkii u diray nuqul si loo aqbalo waa inuu u sheego dhinaca kalena magaca qofka ay agtaallo. Qofkaas waxaa looga baahan yahay inuu siiyo sitaha sharciga u leh nuqul kale;
2. Haddii uu diido, qofka sitaha ah ma isticmaali karo xuquuqda dib u soo celinta, wuxuu xuquuqdaas uu isticmaali karaa oo keliya ka dib markii ashtako uu sameeyo.
   a) in nuqulkii loo diray aqbalaadda aan isaga la soo gaarsiinin in kasta oo uu codsaday;
   b) in aqbalaadda ama lacag bixinta aysan noqon karin mid lagu helo nuqul kale.

**Qaybta 2aad**
Nuqullada

**Qod. 86**

1. Qof kasta oo wata kambiyaale wuxuu xaq u leeyahay inuu ka sameeyo mid ama nuqullo badan;
2. Nuqulku waa inuu si sax ah u waafaqaa asalka, iyo waa in ay ka muuqdaan wareejinnada iyo dhamaan tilmaamaha kale ee halkaa ka muuqdo. Waa la wareejin karaa isla markaana waa la taageeri karaa si la mid ah sida isla saameynta uu ugu yeelan karo nuqulka asalka ah.

**Qod. 87**

1. Nuqulku waa inuu muujiyaa qofka heysta kambiyaalaha asalka ah. Qofka haysto waxaa looga baahan yahay in uu siiyo sitaha sharciga u leh nuqulka;
2. Haddii uu diido, sitaha ma isticmaali karo xuquuqda soo celinta ka dhanka ah dadka wareejiyay ama damiintay nuqulka, haddii kale, ka dib markii uu arkay ashtakada in asalka aan la soo gaarsiinin xitaa codsigiisi kaddib;
3. Haddii nuqulka asalka ah, wareejintii u dambeeysay kadib iyo inta aan nuqul laga sameeynin kahor, uu ku qoran yahay qodobka ah "halkan wixii ka dambeeyo wareejin ansax ma aha ee waa in koobiga lagu qoraa", ama qaaciddooyinka kale ee u dhigma, wareejinta kaloo dambe ee lagu sameeyo asalka dushiisa waa waxba kama jiraan.

**Cutubka 10aad**
Bedelidda

**Qod. 88**

1. Haddii wax laga beddelo qoraalka kambiyaalaha, qofkii saxeexay isbadalka ka dib wuxuu ka jawaabayaa shuruudaha qoraalka la beddelay; qofkii saxiixay ka horna wuxuu ka jawaabaa shuruudaha qoraalka asalka ah;
2. Haddii ayna ka muuqanin kambiyaalaha ama aan la muujin karin in la saxiixay kahor ama kadib, waxaa loo qaadanayaa in lasaxiiyay kahor.

**Cutubka 11aad**
Deynbixid

**Qod. 89**

1. Haddii ay dhacdo in kambiyaalaha uu lumo, la xado ama la baabi'iyo, situhu wuxuu u sheegi karaa qofka lagu maagacaabay in uu bixiyo, wuxuuna weydiisan karaa deyn bixid kambiyaalaha ah asagoo u dacwoonaayo Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka ee goobta kambiyaalaha lagu bixinaayo ama goobta uu deggan yahay;
2. Dacwada waa inuu ku muujiyaa shuruudaha lagama maarmaanka u ah kambiyaalaha iyo, haddii uu yahay kambiyaale maran oo lacag ah, kuwa ku filan in lagu aqoonsado;
3. Guddoomiyaha Maxkamaddu, kadib markii uu sameeyo xaqiijinta ku habboon ee suurta galka ah ee fal iyo xeer ee xuquuqda sitaha, wuxuu soo saarayaa, sida ugu dhaqsiyaha badan, dekreeto uu ku sheegaayo macluumaadka kambiyaalaha, wuxuuna ku dhawaaqayaa deyn bixid in uu ku sameeyay, wuxuuna amrayaa in la bixiyo soddon maalmood kadid oo ka soo bilaabaneyso taariikhda lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, haddii kambiyaalaha uu mar hore dhacay, ama uu yahay aragti, ka soo bilaabanayo taariikhda

dhicitaanka, haddi uu yahay mid ka dambeeyo baahinta, waxaa la rabaa in waqtigaas la joogo in uusan ku sameynin is hortaag;

4. Dekreetadu waa in dacwoodaha uu ogeysiiyaa qofka lagu magacaabay in uu bixiyo kambiyaalaha, ayadoo isla markaana lagu daabacayo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda;
5. In kasta oo la cawdo, bixinta lacagta kambiyaalaha ee la siinaayo qofka mulkiilaha ka hor ogeysiinta dekreetada waxay sii deyneysaa deynqabaha.

**Qod. 90**

Is hortagga milkiilaha waa in ahaato markasta oo la soo jeediyo dacwo oo lagu wargelinaayo dacwoodadaha iyo qofka lagu magacaabay in uu bixiyo kambiyaalaha si uu u hor yimaado maxkamadda meesha lacagta lagu bixinayo.

**Qod. 91**

Muddada lagu caddeeyay qod. 89, dacwooduhu wuu isticmaali karaa ficil kasta oo u janjeero inuu ku dhowro xuquuqdiisa; iyo, haddii uu ku tacluuqo kambiyaale aragti ah ama mid hore u dhacay ah ama mid dhacayo, wuxuu xaq u leedahay inuu dalbado in lacagta lagu bixiyo damaanad ama uu codsado deebaajiga garsoorka ee wadarta ah.

**Qod. 92**

1. Kadib waqtiga kama dambaysta ah ee lagu muujiyay qod. 89 durid la'aan, ama durista lagu diido xukun maxkamadeed oo kama dambays ah, kambiyaalaha lumay wax saameyn ah kuma laha. Qofka helay deyn baxa, wuxuu marka uu u soo bandhigo decreeto iyo shahaadada Kaaliyaha Maxkmadda oo caddeyneyso in aan la durin, ama marka uu soo bandhigo xukunka kama dambaysta ah ee lagu diidayo durista, dalban karaa lacag bixin ama, haddii kambiyaalaha uu yahay mid caddaan ah, ama aan weli dhicin, uu codsado nuqul;
2. Kambiyaalaha ha noqdo mid dhacay ama mid aragti ah oo la cadeeyay in uusan waxtar lahayn waxaa ku waajibaayo dulsaar ilaa xaddiga lagu sheegay qodobbada 55 iyo 56, haddii aan lacagta loo gudbinin si waafaqsan qodobka 48 qofka ka wakiilka ah qofka fadligiisa xukunka uu u dhacay ama loogu dhawaaqay.

**Qod. 93**

Deynta oo la bixiyo waxay baabi'inaysaa dhamaan xuquuq kastoo ka dhalato kambiyaale deynbaxay; laakiin wax saameyn ah kuma yeelanayo sitaha marka loo eego qofka helay deynbaxa.

**Cutubka 12aad**

Dhicitaan

**Qod. 94**

1. Dacwada kambiyaalaha ee ka dhanka ah aqbalalaha waxay dheceysaa saddex sano oo laga soo bilaabo taariikhda dhicitaanka;
2. Dacwadaha sitaha kambiyaalaha ee liddiga ku ah wareejiyeyaasha iyo qofka kambiyaalaha soo saaray waxay dhecayaan hal sano gudeheeda laga soo bilaabo maalinta la keenay ashtakada, lana keenay waqti ku habboon, ama laga bilaabo wakhtiga kama dambaysta ah haddii uu ku qoran yahay qodobka ah “lacag la'aan”;
3. Dacwoyinka wareejiyeyaasha ee midba kan kale ka dhanka iyo qofka kambiyaalaha soo

saaray waxay ku dhacayaan lix bilood gudahood, laga soo bilaabo maalinta wareejiyaha uu bixiyay kambiyaalaha ama maalinta dacwada dib u sheegashada lidka ku ah isaga la soo bilaabay;

4. Dacwada ka tanaadidda waxay dheceysaa muddo sanad ah gudeheeda laga soo bilaabo maalinta lagu guuldareystay dacwada kambiyaalaha.

**Qod. 95**

Hakinta dhicitaanka ayaa waxay waxtar ku leedahay oo keliya qofka lagu fuliyay falka hakinta.

**Cutubka 13aad**

Qodobbo kama Dambeys ah

**Qod. 96**

1. Bixinta lacagta kambiyaalaha ee dhacaayo maalmaha ciidaha dadweynaha ma la weydiisan karo, waxaase la weydiisan karaa maalinta ugu horreysa ee maalinta shaqada. Sidoo kale, dhamaan dacwooyinka kale ee laxiriira kambiyaalaha, sidoo kale soo bandhigidda aqbalaadda iyo ashtakada, lama sameyn karo, wxaase la oggol yahay in la sameeyo maalmaha shaqada;
2. Haddii dacwooyinkaas midkood lagu sameeyo waqti kama dambays ah oo maalintiisu ugu dambeysay ay tahay maalin fasax ah, waqtigaas ayaa loo dheereynayaa ilaa maalinta ugu horeyso ee maalinta shaqada ee xigto. Maalmaha dhexe ee fasaxyada ayaa waxaa lagu tirinaa muddada.

**Qod. 97**

Muddooyinka sharcia ama kuwa lagu heshiiyay lama tirinaayo maalinta ay bilaabmayso.

**Qod. 98**

Lamo oggola ixtiraam maalmo, sharci ah iyo garsoor midna.

**Qod. 99**

Sida waafaqsan ujeeddooyinka qodobbadaan, ereyga 'guri' micnahiisu waa meesha uu deggan yahay, iyo ereyga "meesha lacag bixinta" dhammaanba dhulka Dawladda Hoose.

**CINWAANKA 2AAD**

Deynsheeg

**Qod. 100**

1. Deynsheegtu waxay ka kooban tahay:
   a) Magaca cinwaanka, la galiyay macnaha guud oo lagu muujiyey luqadda ay ku qoran tahay;
   b) ballan qaad aan shuruud ku xirnayn ee ah in la bixiyo lacag cayiman;
   c) muujinta taariikhda dhicitaanka;
   d) muujinta goobta lacag bixinta;
   e) magaca qofka ama qofka amarkiisa lagu bixinaayo lacagta;

f) tilmaanta taariikhda iyo goobta deynsheegta laga soo saaray;
g) Saxiixa qofka soo saaray deynsheegta (soosaaraha).

2. Qoraalka deynsheegtu waxaa sidoo kale la dhihi karaa ama loogu yeeri karaa “kambiyaale”.

**Qod. 101**

1. Kambiyaaleyaasha ay ka maqan yihiin mid ka mid ah shuruudaha lagu xusay qodobka hore looma tirin karo deynsheeg, marka laga reebo xaaladaha ku qoran faqradaha soo socda;
2. Deynsheegta aan lahayn waqti uu dhacayo waxaa loo ictibaaraa in lagu bixin karo aragga;
3. Marka aysan jirin tilmaam gaar ah, goobta laga soo saaray kambiyaalaha ayaa loo tixgelinayaa in ay tahay meesha lacagta lagu bixinaayo iyo wadajir ahaan halka uu deggan yahay soo saaraha;
4. Deynsheegta aan lagu ilmaamin goobta laga soo saaray waxaa loo ictibaarayaa in lagu saxiixay goobta ku dhinac tilmaaman magaca soo saaraha.

**Qod. 102**

1. Haddii nooca lacagta dabeecad ahaan aysan ahayn mid la socon karto deynsheegtu, waxaa lagu dabbaqayaa, qodobbada sharciga ah lee a xiriira kambiyaalaha, oo ku saabsan:
   a) wareejinta;
   b) dhicidda ama waqtiga kama dambeysta ah;
   c) bixinta lacagta;
   d) dacwada deynsheegta, dib uga dhicidda lacagbixinta;
   e) ashtakada;
   f) nuqulo;
   g) beddelaadaha;
   h) dhicitaan;
   i) Maalmaha fasaxyada, tirinta muddada iyo u hoggaansami la’aanta maalmo aan mudneen in la qadariyo.
2. Waxaa sidoo kale si isku mid ah loogu dabaqi karaa deynsheegtu qodobbada ku saabsan kambiyaalaha lacagtiisa la siinayo qof saddexaad ama lagu bixinaayo meel ka duwan deegaanka qofka lagu magacabay in uuu bixiyo, ballanta maslaxadaha, kala duwanaanta tilmaanta isugeynta lacagta, saameynta saxiiyada wax lagu saxiixay duruufaha ku cad qod.7, duruufahaas oo qofka wax saxiixayo uu ku isticmaalo awood la'aan ama awood ka badan awoodiisa, iyo kambiyaalaha cadba;
3. Waxaa sidoo kale qodobbadan lagu dabaqaa deynsheegta qodobbada la xirirro taageeridda. Haddii taageeridda, sida ku xusan qodobka 3 iyo faqradda u dambeyso ayna muujinin qofka la siiyay, waxaa loo qaddariyaa in la siiyay soo saaraha;
4. Waxaa sidoo kale lagu dabaqaa deynsheegta qodobbada la xiriro deyn bixinta iyo qodobka 99.

**Qod. 103**

1. Soosaaraha waxaa waajib ku ah sida isla qaabka qofka aqbalo kambiyaale;
2. Deysheegta lagu bixin karo waqti cayiman waa inuu loo gudbiyo soo saaraha si uu u

arko, waqtiga loo qabtay ee ku xusan qodobka 28aad. Waqtiga wuxuu bilaabmayaa laga bilaabo taariikhda uu soo saaraha ku dhuftay in uu arkay deynsheegta. Haddii soo saaruhu uu diido in uu ku dhufto in uu arkay, taariikheeyana in uu garwaaqsaday ashtakada; taariikhdaas waxay wax ka tereysaa in loo adeegsado dejinta bilowga muddada aragga.

**CINWAANKA 3AAD**

Qodobbo Guud

**Qod. 104**

1. Ansaxnimada kambiyaalaha iyo deynsheegtuba, oo uu ku jiro kuwa aragga ah ama waqti la hubo in la arko, kuma xirno in loo hoggaansamo qodobbada sharciga boollada. Hase yeeshe, haddii aan si caadi ah loo boolleynin asal ahaan, ama waqtiga uu sheegay sharciga, ma lahaanayo tayada awood fulineed;
2. Situhu ma isticmaali karo xuquuuqaha la xiriirto kambiyaalaha haddii uusan bixinin waajibaadka canshuurta boollada ee ku waajibtay iyo wixii kaloo ganaax ah ee ciqaabta laxiriiro;
3. Waxtar la'aanta kambiyaalaha sida kambiyaale aan lahayn awood fulineed waan in uu caddeeyo ama uu xuso sidoo kalena uu ku dhawaaqo garsooraha xitaa xafiis ahaan.

**Qod. 105**

1. Haddii kamiyaalaha uu yahay mid lagu bixinaayo aragga ama waqti cayiman oo arag ah, ama deynsheeg arag ah ama waqti cayiman oo arag ah, uuna keenayo dulsaar ah, canshuurta boollada waa ay waajibaysaa, marka laga yimaado hantida, xataa sidoo kale qadarka lacagta dulsaarka ah oo ay tahay in laga soo xisaabiyo salka tusaalaha ku muujisan. Kambiyaalaha iyo iyada oo ay ugu wacan tahay muddada ansaxnimada kambiyaalaha laftiisa marka loo eego boollada. Si kastaba ha ahaatee dulsaarrada waxaa loo soo xisaabin karaa muddo ka badan toban bilood.

---

**Lifaaqa B**

**QODOBADA LA XIRIIRO JEEG BANGI IYO JEEG WAREEGO**

**CINWAANKA 1AAD**

Jeeg Bangi

**Cutubka 1aad**

Soo Saarista iyo Qaabka Jeegga Bangiga

**Qod. 1**

Jeega bangiga (chèque) wuxuu ka kooban yahay:

a) Magaca jeegga bangiga, oo la dhexgeliyay macnaha guud ee cinwaanka oo lagu dhex muujiyey luqadda lagu qoray;
b) amar shuruud aan lahayn oo lagu bixinaayo lacag cayiman;
c) Magaca qofka lagu magacaabay inuu bixiyo;
d) tilmaantaa goobta lacag bixinta;
e) Tilmaanta taariikhda iyo goobta jeegga bangiga laga soo saaray;
f) Saxiixa qofka soo saaray jeegga bangiga.

**Qod. 2**

1. Kambiyaalaha aan innaba lahayn wax ka mid ah shuruudaha lagu sheegay qodobka hore looma tirin karo jeeg bangi, marka laga reebo xaaladaha ku xusan faqradda soo socoto;
2. Marka aysan jirin tilmaamo gaar ah, rugta lagu tilmaamay dhinaca magaca qofka lagu magacaabay in uu bixiyo waxaa loo tixgelinayaa in ay tahay meesha lacag bixinta. Haddii meelo badan lagu tilmaamo dhinaca magaca qofka lagu magacaabay in uu bixiyo, jeegga wareego waxaa lagu bixin karaa goobta ugu horeyso ee la tilmaamay.
3. Marka ay tani maqan tahay ama wax kastoo kale oo tilmaam ah, jeegga bangiga waxaa lagu bixin karaa goobta laga bixiyay iyo, haddii qofka lagu magacaabay in uu bixiyo uusan ku lahayn goobta dhismo ama warshad, waxaa lagu bixinayaa meesha qofka lagu magacaabay in uu bixiyo ay ugu taallo warshaddiisa ugu weyn;
4. Jeegga bangiga ee uusan ku muujisneen goobta laga bixiyay waxaa loo tixgeliyaa in lagu saxiixay meesha ku tilmaaman dhinaca magaca qofka jeegga soo saaray.

**Qod. 3**

1. Jeegga bangiga waxaa uu ku summadeeysan yahay bangi. Si kastaba ha ahaatee, kambiyaalaha laga soo saaray ama lagu bixin karo meel ka baxsan dhulka Dawladda waa ansax sida jeeg bangi, xitaa haddii lagu sumadeeyay qof aan bangi ahayn;
2. Jeegga bangiga lama soo saari karo haddii qofka jeegga soo saaray uusan lahayn lacag uu isagu leeyahay oo agtaallo qofka lagu magacaabay in uu bixiyo agtiisa oo u xaq u leeyahay in uu ku isticmaalo jeeg bangi, sida waafaqsan heshiis cad ee dahsoon. Si kastaba ha noqotee, kambiyaalaha waxaa uu la mid yahay sida jeeg bangi xitaa haddii aan shuruudaha la ilaalin.

**Qod. 4**

1. Jeegga bangiga lama aqbali karo. Aqbalaad kastoo ee lagu qoro jeegga bangiga waa sida iyadoo aan la qorin oo kale;
2. Caddeyn kasta oo lagu qoro sida, waan ayiday, waan arkay iyo wax kasta kale oo u dhiganto, oo ku qoran kambiyaalaha uuna saxiixay qofka lagu magacaabay in uu bixiyo, ayaa leh oo keliya saamaynta hubinta jiritaanka lacagaha iyo in ay ka hortagto ka laabaasho uu qofka jeegga soo saaray uu ka laabto kahor inta uusan dhammaan waqtiga xaddidaadda.

**Qod. 5**

1. Jeegga bangiga waa la siin karaa:
   a) qof gaar ah, oo leh ama aan lahayn qeexid cad oo "caadi ah";
   b) qof gaar ah, oo leh qeexid «caadi aan aheen» ama wax u dhigma;
   c) Sitaha.
2. Jeega bangiga ee uu door bidaayo qof gaar ah, oo leh qeexidda “sitaha” ama leh wax u dhigma, wuxuu la mid yahay sida jeegga bangiga ee sitaha;
3. Jeegga bangiga ee aan ku mujisneen deyn bixiye wuxuu la mid yahay sida jeegga bangiga ee sitaha.

**Qod. 6**

1. Jeegga bangigu wuxuu noqon karaa amarka isla qofka jeegga soo saaray;
2. Jeegga bangiga waxaa lagu saari karaa qof saddexaad;
3. Jeegga bangiga laguma soo saari karo isla qofka jeegga soo saaray, marka laga reebo xaaladaha in kambiyaalaha laga soo saaray dhismoooyin kala duwan isla qofka jeegga soo saaray uu leeyahay. Xaaladdan oo kale, jeeg looma sameyn karo qofka sitaha ah.

**Qod. 7**

Ballanqaad kasta oo dulsaar ah oo la dhexgeliyo jeegga bangiga wuxuu noqonayaa sida isaga oo aan la qorin oo kale.

**Qod. 8**

Jeegga bangiga waxaa lagu bixin karaa hoyga qof seddexaad, ha noqoto meesha degaanka u ah qofka jeegga soo saaray, ama meel kale, waana in qofkan seddexaad uusan ahayn bangi.

**Qod. 9**

1. Jeegga bangiga oo cadadka lacagta lagu bixinayo ku qoran tahay

xarfo iyo lambarro waa la ictimaadaa, haddii ay jirto kala duwanaansho, waxaa la ictimaadaa lacagta lagu tilmaamay xarfaha.

2. Haddii wadarta lacagta la bixin doono lagu qoro wax ka badan hal mar oo xarfo ah ama

lambar ah, jeegga bangiga, haddii ay jirto kala duwanaansho, waxaa la ictimaadaa wadarta ugu yar.

**Qod. 10**

Haddii jeegga bangigu uu ka kooban yahay saxeexyo dad karti dhiman oo aan qaadi karin waajibaadka uu ku qasbayo jeegga, saxeexyo been abuur ah, ama saxeexyo dad male awaal ah, ama saxeexyo sabab kasta oo kale aan qasbeynin dadka saxiixay jeegga bangiga ama magaca jeegga lagu saxiixay, si kastaba ha noqotee, waajibaadka saxiixayaasha kale ayaa wali ahaanayo kuwo ansax ah.

**Qod. 11**

Saxiix kasta waa inuu ku jiraa magaca ama shirkadda qofka naftiisa ka ah masuulka.

**Qod. 12**

Cunugga xurta ah ee madaxbanaan ee aan loo oggoleyn in uu ganacsado, iyo qofka naafada ah, ma qaadayaan wax waajib ah haddii ay saxiixoodu uusan ku wehlinin saxiixa qofka iyaga kafaaloqaado ayadoo la raacayo shardiga ah “Cawinaad” ama wax u dhigmo. Haddii shardigaas la soo saaray ama mid kale oo u dhigmo, kafaaleqaadaha ayaa shaqsiyan qaadayo waajibaadka.

**Qod. 13**

Waalidka ama ilaaliyiha aan loo idmin inuu ganacsi u sameeyo isaga oo matalayo ilmaha yar ama qofka laga reebay in uu wax sameeyo waxaa lagu qasbikaraa ayada oo loo cuskanaayo magacooda in maxkamadda awoodda u leh ay u oggolaato.

**Qod. 14**

Qof kastoo saxiixo jeeg asagoo ka wakiil ah qof kale oo aan u lahayn awood in uu ku kaco, waxaa waajib ku ah jeegagga bankiga sida isaga oo saxiixay oo kale; iyo, haddii uu bixiyay, wuxuu yelanayaa xuquuq la mid ah isla xuquuqdii uu yeelan lahaa qofka la matalay. Isla qodobkan ayaa khuseynayo wakiilka isticmalay awood ka badan awooddiisa.

**Qod. 15**

Awoodda guud ee qof ku waajibineyso magaca iyo xagga qof kale waxaa ka mid ah xataa soo saarista iyo wareejinta jeegagga, marka laga reebo in wakaaladda uu ku matalaayo ay si ka wadan sheegeyso.

**Qod. 16**

Soosaaraha jeegga ayaa ka jawaabayo wixii lacag bixin ah. Shardi kasta oo ka cafinayo isaga masuuliyadan waa sida ayada oo aan loo qorin oo kale.

**Cutubka 2aad**

Wareejinta

**Qod. 17**

1. Jeegagga bankiga ee la siinkaro qof cayiman oo leh ama aan lahayn qodobka cadeynaayo “in la dalban; karo” wareejinta caadiga ah waxaa lagu wareejin karaa qaab wareejin.
2. Jeegga bangiga la siinayo qof gaar ah iyada oo la raacayo qodobka "in aan la dalban", ama wax kale oo u dhigma, ma noqon karto waxaan ka ahayn in loo wareejiyo qaabka iyo saamaynta wareejinta caadiga ah;
3. Wareejinta sidoo kale waxaa loo samayn karaa iyadoo la doorbido qofka jeegga soo saaray ama qof kastoo kale ee wax ku waajibay. Waxayna awoodaan in ay wareejiyaan mar labaad jegga bangiga.

**Qod. 18**

1. Wareejintu waa inay ahaato mid shuruud la’aan ah. Shardi kastoo lagu xiro waa sida iyadoon la qorin kale;
2. Wareejinta aan dhameystirneyn waa waxba kama jiraan;
3. Waxaa la mid ah oo aan waxba kama jiraan ah wareejinta jeeg soo saaraha;
4. Wareejinta qofka sitaha ah waxay la mid tahay wareejin maran;
5. Wareejinta qofka lagu magacaabay in uu bixiyo waxay la mid tahay sida rasiit, marka laga reebo xaaladda qofka lagu magacaabay in uu bixiyo uu leeyahay xaruumo dhowr ah wareejintana loo leexiyo in lagu sameeyo xaruun ka duwan kan jeegga bankigu uu ku yaallo.

**Qod. 19**

1. Wareejintu waa in lagu qoraa jeegga bangiga ama warqad ku lifaaqan. Waana in inuu ku qoraa wareejiyaha;
2. Wareejintu waa ansax xitaa haddii ka-faa'iideystaha aan la sheegin ama wareejiyaha uu saxiixay oo keliya (wareejin maran). Xaaladdan oo kale, wareejinta si ay ansax u noqoto waa in lagu qoraa dhabarka dambe ee jeegga bangiga ama warqadda lagu dhereriyay.

**Qod. 20**

1. Wareejintu waxay wareejineysa dhamaan xuquuqaha la xiriiro jegga bankiga;
2. Haddii wareejintu ay tahay mid maran, situhu wuxuu:
   a) ku buuxin karaa magaciisa ama magac qof kale;

b) wareejin karaa jegga bankiga mar kale isaga oo maran ama u wareejin karaa qof kale oo cayiman;
c) u gudbin karaa jeegga bankiga qof kale isaga oo aan buuxineynin wareejinta maran iyo isagoon wareejin.

**Qod. 21**

1. Haddii uusan jirin qodob ka hor imanaya, milkiilaha ayaa mas'uul ka ah bixinta;
2. Wuu mamnuuci karaa wareeg kale. Xaaladdan oo kale maahan masuulka ka ah kuwa loo yaqaan jeega bangiga oo mar kale la wareejiyay.

**Qod. 22**

Haystaha jeegga bangiga ee lagu wareejin karo wareejin waxaa loo ictibaarayaa inuu yahay sitaha sharciga ah, haddii uu ugu cudur daaro xaqisiisa wareejinno taxane ah oo is dabajoogo, xitaa haddii kan ugu dambeeya maran yahay. Wareejinnada la tirtiray, waa iyada oo la qorin oo kale. Haddii hal warrejin oo maran ay raacdo wareejin kale, waxaa la ictibaaraa in saxiixaha dambe uu iku ibsaday jeegga bangiga wareejinta maran.

**Qod. 23**

Hal wareejin lagu qoro jeeg bangi ee loo tirin karo qofka sito wuxuu ka dhigaa jeegga wareejiyaha masuul sida waafaqsan qodobbada dib u dhaca ; laakiin ma u beddelayo cinwaanka jeegga bangiga caadi.

**Qod. 24**

Haddii qofku lumiyo haysashada sabab kasta ha noqotee jeegga Bangiga, qofka cusuboo sito ee qaatay jeegga bankiga (ha ahaado jeegu inuu yahay site, am ha adaado jeegga in uu yahay jeeg lagu wareejin karo wareejin, oo situhuuna uu ku cudur daaray xaqiisa,sida iyo habka lagu tilmaamay qod. 22), kuma khasbana inuu soo celiyo ilaa ay jirto mooyee in uu ku soo iibsaday qaab niyad xun ama in uu sameeyay khalad culus oo aad u daran isaga oo iibsanaya.

**Qod. 25**

Qofka tallaabo laga qaadayo jeegga Bangiga sababtiisa ma ku hor istaagi karo sitaha is hortaag aan caadi ahayn oo ku saleysan cilaaqaadka shaqsiyeed ee uu la lahaa soo saaraha iyo siteyaashii hore; haddii uusan situhu, markuu iibsaday jeegga bangiga kadib, uu u u dhaqmay si ula kac ah si loo waxyeeleeyo deynsanaha.

**Qod. 26**

1. Haddii wareejinta lagu qoro qodob ah ama jumladdu ah “lacag uruurin” “uruurin” “wakiil ahaan” ama qodob kale oo keenaayo waajibaad, situhu wuu ku isticmaali karaa dhamaan xuquuqdiisa ee la xiriiro jeegga bankiga, laakin ma wareejin karo ama ma gudbin karo marka laga reebo wakiil mooyee oo u warejiyo;
2. Xaaladdan oo kale, dadka ay khasabka ku tahay ma hor istaagi karaan sitaha, waxayse ku hor istaagi karaan waxyaabaha loo oggol yahay in uu ku hor istaago wareejiyaha;
3. Waajibaadka ku jira wareejinta wakaadda ma ku baa’baayso geerida ku timid dhimashada maamulaha ama karti darida awgeed.

**Qod. 27**

1. Wareejinta la sameeyay ashtako ama kormeer u dhigma kadib, ama markii taariikhda kama dambaysta ah ee gudbinta ay dhacay, waxay dhalineyso raad sharci ah keliya marka ay tahay nooca siismada caadiga ah;
2. Wareejinta aan taariikhda lahayn waxaa loo qaadanayaa, haddii aan si kale loo caddeeynin, in la sameeyey kahor ashtakada ama kprmeer u dhigma, ama ka hor dhicitaanka muddada lagu caddeeyay faqradda hore.

**Cutubka 3aad**

Damiin

**Qod. 28**

1. Bixinta jeegga bangiga waa la dammaanad qaadi karaa ayadoo la damiinanayo dhammaan ama qayb ka mid ah lacagta;
2. Dammaanad qaadkan waxaa la siin karaa dhinac saddexaad, marka laga saaray soosaaraha jeegga, ama xitaa saxiixaha jeegga bangiga.

**Qod. 29**

1. Damaanadda waxaa lagu qoraa jeegga bangiga dushiisa ama dusha warqadda lagu dhereriyay ama lagu kordhiyay,
2. Waxaa lagu muujiyaa ereyada "damaanad", ama qaab kale oo u dhigma. Waxaa saxiixayo damiintaha,
3. Waxaa loo tixgaliyaa in la siiyay saxiixa damiintaha oo kaliya oo lagu qoro wejiga hore ee jeegga bangiga, bishardi in saiixa uusan ahayn kan soo saaraha;
4. Dmiinte kasta waa inuu tilmaamaa cidda damaanadda la siinayo. Haddii tilmanta ay maqan tahay, waxaa loo ictibaaraa in la siiyay soo saaraha.

**Qod. 30**

1. Damaanadqaaduhu wuxaa waajib ku ah sida isla qaabka qofka la siiyay taageerada;
2. Waajibka dammaanad-qaaduhu waa ansax xiitaa haddii waajibaadka la dammaanadqaaday uu yahay mid waxba kama jiraan sabab kasta oo aan ka ahayn cilad dhinaca qaabka ah;
3. Damaanadqaadaha ee bixiya lacagta jeega bangiga wuxuu iibsanayaa xuquuqaha la xiriiro kan la taageeray iyo kuwa waajib ka saaran dhankiisa saameynta jeegagga bankiga awgeed.

**Cutubkaa 4aad**

Soo Bandhigid iyo Bixin

**Qod. 31**

1. Jeegga bangiga waxaa lagu bixin karaa iyadoo la dalbado. Wixii ka soo horjeedo waa sida ayada oo la qorin oo kale;
2. Jeegga bangiga oo loosoo bandhigay lacag bixin kahor maalinta la tilmaamay sida taariikhda la soo saaray, waxaa la bixin karaa maalinta bandhigga.

**Qod. 32**

1. Jeegga bangiga waa in loo soo bandhigaa lacag bixin labaatan maalmood gudahood,

haddii lagu bixin karo isla isla degmada laga soo saaray; soddon maalmood haddii lagu bixinaayo magaalo kale;

2. Jeeg bangi oo laga soo saaray waddan ka duwan kan lagu bixin karo waa in lagu soo bandhigaa soddon ama lixdan maalmood gudahood, taas oo ku xiran hadba meesha ay ku taallo halka laga bixiyay iyo meesha lacag bixinta ay tahay isla qaaradda ama qaarado kala duwan;
3. Shuruudaha kor ku tilmaaman ayaa ka soo bilaabmayo maalinta lagu caddeeyay jeegga bangiga oo ah sida taariikhda la soo saaray.

**Qod. 33**

Haddii jeega bangiga loogu ganacsanaayo laba goobood oo uu kala xado jadwal taariikh oo kala duwan, malinta la soo saaray waxa lagu beddelaa mid ku habboon oo u dhiganta jadwalka taariikhda goobta lacag bixinta.

**Qod. 34**

Soo gudbinta dacwo magdhow waxay u dhigantaa u soo bandhigid lacag bixin.

**Qod. 35**

1. Amarka ah inaanu bixin wadarta lacagta jeegga bangiga wax saameyn ah ma lahan, haseyeeshee waxay saameyn yeelaneysa kadib waqtiga kama dambeysta ah ee soo gudbinta uu dhacayo;
2. Maqnaanshaha amarka sidan oo kale ah, soo saaraha wuxuu awoodaa xataa bixinta ka dib marka ay dhammaato muddada.

**Qod. 36**

Dhimashada soo saaraha, ama haddii itaal darro ku dhacdo markuu soo saaro kadib, waxba kama badelayaan saamaynta jeegagga bangiga.

**Qod. 37**

1. Soosaaraha bixiyo jeegga bangiga ayaa wuxuu dalban karaa in uu isaga u soo celiyo rasiit sitaha;
2. Sitaha ma diidi karo qayb ahaan bixinta;
3. Haddii ay dhacdo in qayb la bixiyo, sitihu wuxuu weydiisan karaa in lagu qoro jeegga bankiga dushiisa iyo in la siiyo rasiit.

**Qod. 38**

Soosaaraha ee bixiyo jeeg bangi xawaalad ee lagu wareejin karo wareejin waxaa laga rabaa in uu hubiyo sii wadida joogtada ah ee wareejinnada, laakiin ma'aha in la hubinyo xaqiiqada dhabta ah ee iyo saxeexayaasha wareejiyeyaasha.

**Qod. 39**

1. Haddii jeegga bangigu lagu bixin karo lacag aan lahayn dabcan meesha lagu bixiyo, wadarta ayaa lagu bixin karaa gudaha muddada lagu soo bandhigayo lacagta dalka sida uu sheegayo qiime maalinta lacag bixinta. Haddii lacagta la bixin waayey marka la soo bandhigo, sitaha ayaa laga yaabaa, ikhtiyaarkiisa, inuu ku codsado in lacagta lagu bixiyo tan dalka sida ku xusan qiimaha maalinta la soo bandhigo ama maalinta lacag bixinta;
2. Qiimaha lacagta qalaad waxaa lagu go'aamiyaa adeegsiga meesha lacag bixinta.

Soosaaruhu wuxuu xaqiijin karta wadarta lacagta labixinayo in loo xisaabiyaa iyadoo loo eegayo lacagta ku qoran jeegga;

3. Qodobada kor ku xusan ma khuseeyaan haddii ay dhacdo soosaaruhu xaqiijiyay in lacag bixinta lagu sameeyo lacag si cad loo muujiyey (qodobka lacag bixinta wax ku oolka ah ee sarrifka lacagta shisheeye);

4. Haddii wadarta lacagta lagu muujiyo qaddar lacag isku mid ah, laakiin leh qiimo ka duwan qiimaha dalka laga soo saaray iyo dalka lacag bixinta, waxaa loo qaadanayaa in tilmaanta loola jeedo lacagta meesha lacga bixinta.

## Cutubka 5aad

Qaababka Gaarka ah ee Jeegagga Bangiyada

### Qod. 40

1. Soosaaraha jeegga bangiga waxaa uu hor dhigi karaa jeegga caqabad kaasoo yeelanayo saamaynta lagu tilmaamay qodobka soo socda;
2. "Caqabadaha" waxaa lagu sameeyaa laba diilimood oo isbarbar socda oo lagu qoraayo wejiga hore. Waxay noqon kartaa mid guud ama mid gaar ah;
3. Caqabadda waxaa la dhihi karaa waa mid guud, haddii labada diillimood dhexdooda uusan ku jirin wax calaamad ah ama uu ku qoran yahay ereyga ah “masuul bangi” ama erey la mid ah; waxaa la dhihi karaa waa mid gaar ah, haddii labada diillimood dhexdooda ay qoran tahay “magaca massul bangi”; waa mid gaar ah haddii labada diillimood dhexdooda ay ku qoran tahaymagaca masuul bangi;
4. Caqabaddu guud waxaa loo beddeli karaa caqabad gaar ah; haseyeeshee tan dambe looma beddeli karo tan guud;
5. Tirtiridda caqabadda ama magaca masuulka bangiga waa sida iyada oo aan la sameynin oo kale.

### Qod. 41

1. Jeegga bangiga oo leh caqabad guud ma noqon karo mid uu bixiyo soo saare ee waxaa bixin karo masuul banki ama ama macaamiilaha soo saaraha;
2. Jeegaga bangiga oo leh caqabad gaar ah ma noqon karo mid uu bixiyo soo saaraha, waxaa bixin karo bangiga loo qoondeeyay, ama – haddii kan uu yahay soo saare waxaa bixin karo macaamishiisa. Hase yeeshe, bangiga loo qoondeeyay wuxuu u adeegsan karaa ururinta bangi kale,
3. Bangi ma iibsan karo jeegag la xiray, wuxuuse ka iibsan karaa macmiishiisa ama bangi kale. Lacag kuma uruurin karo xisaabta dadka kale marka laga reebo kuwa sare.
4. Jeeg bangi oo leh caqabado badan oo khaas ah ma bixin karo soo saaraha, marka laga reebo labo mooyee in ay carqaladahu yihiin labo, kuwaas oo mid ka mid ah loogu uruurinayo magdhow;
5. Soosaaraha ama khasnad hayaha bangiga ee aan dhawrin qodobbada hore ayaa mas'uul ka ah waxyeelada, oo ku kooban xadka lacagta jeegga bangiga.

### Qod. 42

1. Soo saaraha ama sitaha jeeg bangi wuxuu mmnuuci karaa in jeegga lagu bixiyo lacag caddaan ah, asagoo si ishaaf ah ugu ereyada ah qoraayo wejiga hore ereyga ah “amaahin” ama erey kale oo u dhigmo;

2. Xaaladdan, jegga bankiga ma habeyn karo qof kale oo aan ka aheyn qofka lagu magacaabay in uu bixiyo asagoo isticmaalayo qoral xisaabeed (amaahin xisaab, wareejin xisaab magdhow). Xeerka qoraal xisaabeedku waxuu la mid tahay lacag bixin;

3. Tirtiridda ereyada "in la aqoonsado" waxay u dhacdaa in aan la qaban;

4. Soosaaraha ee aan u hoggaansanayn qawaaniinta kore ayaa ka jawaabaya waxyeelada sida waafaqsan xadka xaddiga lacagta jeegga bangiga;

5. Soosaaraha looma baahna in la siiyo awood uu ku aqoonsado jeegga ee waxaa aqoonsanayo qof leh xisaab socoto.

**Qod. 43**

1. Jeegga bangiga oo lagu soo qoray ereyga “lama wareejin karo” lama siin karo qof aan ka ahayn kan wato, ama codsiga qofka lagu amaahiyay xisaabtiisa socoto. Qofka wato wuxuu u wareejin karaa oo keliya jeegga bangiga uruuriyaha; kan dambena ma wareejin karo. Wareejinta lagu qoro ayadoo la khilaafayo diidmadaas, waxay ka dhigan tahay sida iyada oo aan dhicin;

2. Qofka bixiyo lacg jeeg aan loo wareejin qof ka duwan kan wato ama masuulka bankiga ee wax uruuriyo, ayaa ka jawaabayaa bixinta;

3. Ereyga " lama wareejin karo" sidoo kale waxaa ku qori karo xataa masuulka bankiga markay codsadaan macmiisha;

4. Isla ereygaas waxaa ku qorin karo wareeejiyaha wuxuuna yeelanayaa saameyn isku mid ah;

5. Qodobbada faqradda hore ayaa loo adeegsan karaa oo keliya jeeggaga lagu bixin karo dhulka Jamhuuriyadda.

**Qod. 44**

Soo saaraha jeegga bangigu wuxuu ka dhigi karaa lacag bixinta mid ku tiirsan jiritaanka xaq milkiyad oo sharci ah, waqtiga la soo bandhigayo, saxeex laba jibaarida saxiixa sitaha ah (jeeg "dalxiis").

**Cutubka 6aad**

Dib u Celinta

**Qod. 45**

1. Situhu wuxuu ku adeegsan karaa xuquuqda dib-u-celinta kuwa wax wareejiyo, soo saaraha iyo wixii kale ee waajib ku ah, haddii jeegga bangiga - oo lagu soo bandhigay waqtigii loogu talagalay - aan la bixin, haddii diidmada lacag bixinta la caddeeyo:

a) fal dhab ah (ashtako);

b) ama iyadoo qoraal caddeyn ah uu ku qoro qofka lacag bixiyahay ah uu ku qoro jeegga bangiga ayada uu ku muujinaya goobta iyo maalinta soo-bandhigidda;

c) ama ku dhawaaqo caddeyn codsi magdhow, taariikheysan oo cadeynaya in jeegga bangiga loo soo diray waqti fiican lacagtana aan la siinin.

2. Situhu wuxuu xajinayaa xuquuqdiisa lidka ku ah soo saaraha, in kasta oo jeegga bangiga aan si dhaqso ah loo soo bandhigin ama la sameynin ashtako ama wax u dhigma la helin. Haddii, taariikhda kama dambaysta ah ee gudbinta ay dhamaato, helitaanka wadarta lacagtana la waayo sabab laxiriirto qofka lagu magacaabay in uu bixiyo dartiis, sitaha wuxuu luminayaa xuquuqahan gabi ahaan ama inta ku xaddidan qayb ka mid ah wadarta lacagta la waayi.

**Qod. 46**

1. Ashtakada ama warbixinta u dhiganta waa in la sameeyaa ka hor inta waqtigii loo qabtay soo gudbinta uusan dhicin;
2. Haddii soo jeedinta la sameeyo maalinta ugu dambeyso xilliga uu dhacayo, ashtako iyo hubin u dhiganta ayaa la samayn karaa maalintashaqo koowaad ee xigta.

**Qod. 47**

1. Situhu waa inuu ogeysiiyaa wareejiyeyashiisa iyo soo saarahuba bixin la'aanta afarta maalinshaqo gudaheeda ee xigto maalinta ashtakada ama cadeynta u dhiganta; ama. haddii ay jirto erey "lacag la'aan", isla maalinta la soo bandhigayo;
2. Wareejiye kasta, labada maalmood ee shaqo ee ku xigta maalinta uu helay ogeysiiska, waa inuu ogeysiiyaa wareejiyaha hore ogeysiiska uu helay, isaga oo muujinaya magaca iyo cinwaanada kuwa iyagu la siiyay digniinaha hore, iyo wixii la mid ah, isagaoo dib ugu laabanaayo ilaa soo saaraha. Shuruudaha kor lagu soo sheegay waxay ka bilowdaan helitaanka ogaysiiska hore;
3. Haddii sida ku xusan faqradda hore, ogeysiiska la siiyay saxiixaha jeega bangiga, ogeysiis la mid ah waa in la siiyo uu ka socdaa, isla muddadaas gudaheeda, taageerihiisa;
4. Haddii hal wareejiye uusan muujin cinwaankiisa, ama uu u muujiyey si sharci darro ah, waxaa ku filan in digniinta la siiyay wareejiyaha ka horeeyay;
5. Qofka ogeysiika bixinayo ayaa looga baahan yahay inuu u bixiyo ogeysiiska wuxuu ku bixin karaa qaab kasta, iyo sidoo kale uu si sahlan ugu diraayo jeegagga bangiga;
6. Waa inuu caddeeyaa inuu kuugu siiyay ogeysiiska muddadii loo qabtay. Waqtiga kama dambaysta ah waxaa loo qaddariyaa in la ixtiraamay haddii warqadda ay kujirto ogeysiiska laguugu soo diray boostada muddada aan soo sheegnay;
7. Qof kasta oo aan ogeysiis ka bixin muddada aan soo sheegnay ma dhacaayso muddada. Dib u celinta; si kastaba ha noqotee wuxuu mas'uul ka yahay dayacaaddiisa haddii uu sababay waxyeelo uu gaysatay, iyada oo lacagta magdhowga ah ee la bixinaayo aysan dhaafeyn lacagta jeegga bangiga.

**Qod. 48**

1. Soo saaraha, wareejiyaha, ama damiintaha waxay, ayagoo isticmaalayo qodobka “kharaj la’aan” ama qodob kaloo u dhigmo ku qori karaan kambiyaalaha wayna saxiixi karaan, mamnuuci karaan sitaha waajibaadka ashtakada iyo caddeynta u dhiganto si uu u isticmaalo dibudhac;
2. Qodobkaas, marka laga reebo amarka ku qoran qod 45 faqradda u dambeyso, ma ma mamnuucaayo sitahat in uu soo bandhigo jeegga bankiga muddadii lagu qoray ama ogeysiiska muddadii lagu qoray. Caddeynta muddadaas in aan la ilaalinin waxay saaran tahay qofka sitaha hor istaagayo;
3. Haddii qodobka uu ku qoro soo saaraha, qoritaankaas wuxuu saameyn ku yeelanayaa Dhamaan saxiixayaasha; haddiise uu ku qoro qof wareejiye ah ama damiinte ah, saameyn Waxay ku yeelaneysa oo keliya qofkaas. Haddii qodobka uu ku qoro soo saaraha, situhu wuxuu ka qaadi karaa ashtakada ama sameyn karaa hubin u dhiganto, khrajkana wuxuu niqonayaa dushiisa. Haddii qodobka uu ku qoro hal wareejiye amah al damiinte, kharajka ashtakadu ama khrajka hubsashada u dhiganto, haddiiba la sameeyay, waxaa la warsan karaa dhamaan saxiixayaasha.

**Qod. 49**

1. Dhamaan dadka uu Jeeggu bankiga ka saaran yahay waajibaadka waxay si wadajir ah uga hor jawaabayaan sitaha;
2. Situhu wuxuu xaq u leeyahay in uu tallaabo ka qaado dhammaan saxiixayaasha keli keli ama si wada jir ah; looma baahna inuu dhawro sida ay u kala horeeyaan taas oo ay ku qasbeen naftooda;
3. Xuquuq la mid ah ayaa waxaa iska leh saxiixe kasta oo bixiyay lacagta jeegga bangiga.
4. Tallaabada laga qaaday mid ka mid ah kuwa uu waajibka saaran yahay kama hor-istaageyso, inuu ka hortagto dadka kale, xitaa haddii kan markaas lagu fulinayo uu ka dambeeyay kuwa kale wixii hore loo qabtay.

**Qod. 50**

Situhu wuxuu dib u waydiisan karaa:

a) qadarka jeegga aan la bixin;
b) dulsaarka heerka sharciga ah laga soo bilaabo maalinta la soo bandhigay;
c) Kharashaadka ashtakada ama hubinta u dhiganto, kuwa loogu talagalay ogeysiisyada macluumaadka, iyo kharashyada kale.

**Qod. 51**

Qofka bixiyay lacagta jeega bangiga wuxuu ka soo ceshan karaan dammaanad-qaadayaashooda:

a) wadarta guud ee la bixiyay;
b) dulsaarka wadarta, oo lagu xisaabiyo canshuurta sharciga ah ee maalinta bixiyay;
c) Kharashaadka ku baxay.

**Qod. 52**

1. Qof kasta oo uu waajib saaran yahay ee lagu socodssiyo xuquuqda dib u soo celinta ayaa ka dalban kara markuu bixiyo lacagta, in lagu wareejiyo jeega bangiga, ha u ashtakooda ama ha sameyo hubaal u dhiganto, iyo rasiidka koontada dib loo soo celiyay;
2. Wax kastoo: iibiyaha iibsaday jeegga bangiga wuu awoodaa jooji dhankaaga iyo kuwa soosocda xigta.

**Qod. 53**

1. Haddi xannibaad aan la gudbi Karin (qodob sharci ee dawladeed ama xaalad kale ee awood sareyso) ay ka reebto in uu soo gudbiyo jeegga bankiga, in uu ka qaado ashyakada, ama in uu helo hubal celin u dhiganyo sida waafaqsan Sharciga, waa la dheereynayaa;
2. Sitaha waxaa laga rabaa in uu si dhaqsi ah u ogeysiiyo xaaladda awoodda ka Sareyso wareejiyaha hore iyo in uu ku qoro, jeegga bangiga iyo warqadda dheereynta, Ogeysiiska caddeyn taariikheysan una saxiixo. Inta harsan, waxaa lagu dabaqayaa Qodobka 47;
3. Haddii awoodda ka sareyso ay istaagto, sitaha waa in uu ku soo bandhigo daahid la’aan Jeegga bangiga bixintiisa; iyo haddii loo baahdo, uu ka qaado ashtakada ama uu helo hubaal celin u dhiganto;
4. Haddi awoodda ka sareyso ay sii socoto wax ka badan shan iyo toban maalmood laga soo bilaabo maalintii situhu uu ogeysiiyay xaaladda awoodda ka sareyso wareejiyaha ugu horeeyay, inkastoo ogeysiiska la siiyay ka hor dhamaansha waqtiga soo bandhigidda, wuxuu ku isticmaali dib ugu laabto isagoon soo bandhigin, ashtako ama hubasasho u dhiganto;

5. Lama tixgeliyo xaaladaha awooddu ay sareyso falalka shakhsiga ah ee sitaha ama qof uu Isagu u soo xilsaartay in uu soo bandhigo jeegga bangiga, qaado ashtakada bangiga ama uu helo hubaal celin u dhiganto

**Qod. 54**

Dhowr waajib qadeyaal oo ka qaatay mowqif siman jeegga bangiga, ma lahanaayo saami bangi, iyo xiriirka oo uu habeeyo qodobbo la xiriiro Waajibaad wadareed.

**Qod. 55**

1. Jeega bangigu wuxuu leeyahay saameynta saami la dhaqan gelin karo, marka loo eego raasumaalka iyo wayaabaha kaloo yar yar, iyadoo la raacayo qodobka 50aad iyo 51aad;
2. Jeeg lagu soo saaray dibedda wuxuu leeyahay isla saameyntaas oo kale waayo kuwan waxaa laga aqbalaa sharciga meesha jeegga laga soo saaray.

**Qod. 56**

Duristu dib uma dhigeyso fulinta; laakiin Guddoomiyaha Maxkamadda awoodda u leh, markuu rafcaan ka soo qaato qofka ka soo hor jeeda ee wax duraayo ee aan aqoonsanayn saxiixiisa ama wakiilnimada ama si dhab ah u caddeeyo halista iyo sababo aasaasi ah, waxaa laga yaabaa, iyada oo uu adeegsanayo go’aan qaddarin iyo dhiirrigelinba leh oo aan ku xirneyn wax culeys ah,in uu baaro dukumiintiyada la soo saaray, hakiyo gebi ahaanba ama qeyb ahaan xukunnada fulinta ah ayada oo uu dhigaayo lacag damaanad ah oo ku habboon.

**Qod. 57**

1. Deynsanaha wuxuu ka keeni karaa diidmo xukunka ka reeban baabi’inta jeegga bankiga, sida waafaqsan qod. 2 iyo kuwa uusan mamnuucin qod. 25;
2. Haddii waxyaabaha ka reeban ay muddo dheer taagan yihiin, Xaakinku, markuu soo codsado qofka deyn bixiyaha ah, wuxuu soo saaraa xukun ku meel gaar ah, oo uu ku soo saarayo damiinasho ama damiin la'aan;
3. Waxa kale oo uu siin karaa, markuu soo weydiisato deynqabaha kadib goorta ay jirto sabab qatarta ah, joojinta fulinta, asagoo soo rogaayo haddii uu u arko inay ku habboon tahay in la dhigo curaar u qalanto;
4. Haddii hakin mar hore lagu siiyay go’aanka lagu muujiyey faqradda hore, Garsooraha isagoo sii wado dacwada wuxuu go'aamiyaa xaqiijinta ama ka noqoshada go’anka laftiisa.

**Qod. 58**

1. Haddii xiriirka sababay in la soo saaro ama la wareejiyo jeegga bangigu uu ka dhasho dacwo, dacwadaas waa ay jiraysaa inkastoo jeegagga la soo saaray ama la wareejiyay, marka laga reebo in la cadeeyo in ay jireen waxyaabo cusub;
2. Haystaha ma dhaqaajin karo waxqabad marka laga reebo inuu uu u sameynayo deynqabaha ballanqaad ah in uu dib u celinaayo jeegga bangiga iyo in uu dhigaayo Kaalinta Garsooraha awooda u leh, ka dib markuu fuliyo shuruudaha lagama maarmaanka u ah inuu deynqabaha laftiisu uu yeesho xaqa dib u helida kaalmeysashada oo laga yaabo in masuuliyadda uu isagu leeyahay.

**Qod. 59**

1. Haddii situhu uu lumiyay jeegga dhammaan dadka dacwada ka dhanka ah ee waajibaadka kasaaran iyo in uusan isla markaana ku lahayn in uu iyagu dacweeyo, wuxuu dacweyn karaa Baniga oo aan sameynin kuna talaabsan shuruudihii loo baahnaa, ama si kastaba ha ahaatee si xaqdaro ah uga faa'iideystay waxyeeleyntiisa;
2. Dacwad taas la mid ah wuxuu ku sameyn karaa, ayada oo la raacayo xaaladaha kor ku xusan, wareejiyaasha.

**Qod. 60**

1. Cabashadu waa in lagu sameeyaa warqad Nootaayo ah ama qoraal sharciyaqaan hubiyo in la fuliyay amarrada maxkamadda;
2. Degmooyinka dawladahooda hoose aan lahayn Nootaayo ama sharciyaqaan hubiyo in la fuliyay amarrada maxkamadda, cabashada waxaa qaadi kara Xoghayaha Dawladda Hoose;
3. looma baahno kaalmo markhaatiyaal s loo soo gudbiyo cabashada.

**Qod. 61**

1. Cabashadu waxaa lagu sameyn karaa dukumeenti gaar ah, ama waxaa lagu qori karaa dusha jeegga bangiga ama nuqul ka mid ah, ama xaashida dheeraynta. Xaashidan waxaa sidoo kale ku dari karo Nootaayaha ama sharciyaqaan hubiyo in la fuliyay amarrada maxkamadda, ama xoghayaha dawladda hoose, kuwaasoo, si kastaba xaalku ha ahaadee, ay tahay inay ku shaabadeeyaan saxiixooda meesha ay warqadda isaga xirmeyso.
2. Haddii cabashada lagu sameeyo warqad gaar ah, qofka sameynaayo waa inuu ku qoro jeegga bangiga dushiisa ama koobiga ama xaashida dheeraynta, haddii cabashadu aan la sameeynin iyada oo aan la haysan jeegga.

**Qod. 62**
**Goobta Ogaysiiska Ashtakada Diidmada**

1. Ashtakada diidmada waa in ay ka dhacdaa goobta lacag bixinta (2. 81), liddiga ku ah macaamilka ama kan saddexaad ee lagu tilmaamay lacag-bixinta, xitaa haddii aanay joogin.
2. Haddii deegaanka dadka la soo sheegay aan la helikarin, ashtakada diidmada waxay ka dhici kartaa meel kasta oo ka mid goobta lacag-bixinta, kolba halka uu doorto qofka hawsha socodsiinaya.
3. Karti darrida macaamilka ama kan saddexaad ee lagu sheegay qod. 8 kama reebayso waajibaadka ashtakada diidmada isaga liddiga ku ah marka laga reebo marka uu musalifo amranaha bixinta jeegga, markaasna, muujinta xukunka musalifnimada ayaa ka kaafinaysa dib u dalbashada kan saddexaad (regresso).
4. Haddii amranaha bixinta jeegga ama kan saddexaad uu geeriyoodo, ashtakada diidmada markasta waxay ku soo baxaysaa magaciisa sida uu qabo nidaamka la soo sheegay.

**Qod. 63**
**Waxa ay Xambaarsantahay Diidmada Ashtakada**

1. Ashtakada diidmada waa in ay ku caddahay:
   a) taariikhda;
   b) magaca codsadaha;
   c) tilmaanta goobta laga sameeyay raadinta;

d) mowduuca codsiga, magaca qofka la raadinayo, jawaabta laga helay ama sababaha aan warba looga hayn;
e) saxiixa Notaayada, ama gaarsiiyaha, ama xoghayaha dawladda Hoose ee sameeyay (60).

2. ahstakada diidmada ee dokumentiga goonida ah waa in ay la socotaa minguurinta maguurtada ( trascrizione) jeegga bangiga.
3. jeegagga badan ee lagu siinayo isla qofka isla goob, daynluhu wuxuu ku samayn karaa ashtakada diidmada hal dokumenti.

**Qod. 64**
**Caddaynta Beddelka Ashtakada Diidmada**

1. Ashtakada diidmada sida uu qabo qod. 45 waxaa laguu baddali karaa, haddii qofka sita uu oggolaado, caddaynta diidmada lacag-bixinta, oo lagu qoro warqadda ku dherersan (19) iyo amranaha bixinta jeegga oo saxiixo (11);
2. Caddayntaasi si ay u yeelato miradhalka ashtakada diidmada, waa in lagu sameeyaa diiwaangelinta isla waqtiyada (60).

**Qod. 65**
**Wareejinta aan Taariikhda lahayn**

Marka ay jirto xaaladda qodobka kor lagu soo sheegay, wareejinta aan taariikhda lahayn waxaa la qiyaasayaa in la sameeyay muddo ka horreysay caddaynta.

**Cutubka 7aad**
Nuquullada/Koobiyada

**Qod. 66**
**Hab-Dhaqanka**

Marka laga reebo jeegagga bangiga qofka sita (5), jeeg kasta ee bangi, ee laga sameeyay Dal, oo Dal kalena laga bixin karo, waxaa laga sameyn karaa noocyo nuqullo/koobiyo kala duwan.

Haddii hal jeeg laga sameeyo noocyo nuqllo badan, kuwaas waa in la siiyaa lambarro cutub kasta (titolo); haddii cillad ay jirto, waxaa loo aqoonsanayaa jeegag bangi ee kala gaara.

**Qod. 67**
**Lacag-bixinta hal Nuqul**

1. lacag-bixinta nuqulka waxay ka xilqaadaysaa xitaa haddii aan la caddayn in lacag-bixntaas ay burinayso raadadka nuqullada kale;
2. Wareejiyaha isaguna cid kale u wareejiyay nuqullada iyo warejiyaasha kale ee ku sii xiga waxay masuul ka yiihiin nuqullada idil ee wata saxiixooda oo aan la baddalin.

**Cutubka 8aad**
Baddalidda

**Qod. 68**
**Wax ka Baddalka Buugga Jeegga**

1. Haddii wax laga baddalo buugga jeegga bangiga, qofka saxiixay baddalka ka bacdi ayaa ka jawaabaya, qofka saxiixay ayaa marka hore ka jawaabaya erayada baddalka ku yimid ee buugga asalka;
2. Haddiiba aanay ka muuqan warqadda, ama aan la caddayn in la saxiixay ka hor iyo ka dib, waxaa la qiyaasayaa in markii hore la saxiixay.

**Cutubka 9aad**
Habraaca Qiima-tirka Jeegga

**Qod. 69**
**Habraaca Qiima-tirka Jeegga (Ammortamento**)

1. Haddii jeeggu uu lumo, googo'o ama baaba'o waxaa lagu ashtakeyn karaa bixiyaha lacagta jeegga iyo in la codsado qiima-tirka jeegga Guddoomiyaha Maxkamadda goobta jeegga laga bixiyay laha (81), ama goobta uu codsaduhu degganyahay;
2. Cabashada waa in lagu tilmaamaa shuuruudaha lagama maarmaanka ee jeegga bangiga.
3. Guddoomiyaha Maxkamadda, ka dib marka uu sameeyo baarisyada ku habboon ee la xariira sugnaanshaha falalka iyo xuquuqda qofka sita jeegga, wuxuu soo saarayaa waqtiga ugu dhaqsiyaha badan Dekereto lagu sheegayo xogta jeegga bangiga, wuxuu ku dhawaaqayaa amarka qiima-tirka jeegga isagoo fasaxaya lacag bixinta kadib shan-iyo-toban cisho oo ka bilaabata taariikhda lagu faafiyo Faafinta Rasmiga, haddii haystaha/sitaha aan laga keenin is hortaag waqtiga habboon. (79);
4. Dekereetadu waa in u suurtagelisaa codsadaha, iyadoo la wargelinayo bixiyaha jeegga iyo bixiyaha lacagta jeegga, laguna faafiyaa Faafinta Rasmiga;
5. Sikastaba ashtakadu, haddii lacag-bixinta jeeggga la siiyo sitaha/haystaha wargelinta ka hor Dekereetada waxay madax bannaynaysa wareejiyaha (2. 81).

**Qod. 70**
**Ishortagga Sitaha/Haystaha**

Ishortaagga haystha waa in uu i lagu keenaa waraaq la wargelinayo yo codsadaha, amar bixiya jeegga ama la amaranha bixinta jeegga si ay u hor yimaadaan Maxkamadda goobta lacag bixinta (2, 81).

**Qod. 71**
**Xuquuqda Codsadaha inta lagu jiro Muddada is Hortaagga**

Inta lagu jiro muddada is hortaagga ee ku qoran qod. (69), codsaduhu wuxuu samayn karaa wax kasta oo uu ku hanan karo xuquuqdiisa; wuxuu kaloo dalban karaa lacag-bixinta jeegga isago dammaanad keena, ama codsado in lacagta lagu keydiyo Maxkamadda.

**Qod. 72**
**Waxa ka Ratimaya Qiima-tirka Jeegga**

Marka ay dhammaato muddada ku xusan qod. 69, haddii aan is hortaag la keenin ama is hortaagga lagu diido xukun kama dambays ah, jeegga bangiga lumay wuxuu luminayaa saamayn kasta uu lahaa. Qofka haysta amarka qiima-tirka jeegga, wuxuu awoodaa, isagoo in uu soo

bandhigo Dekereetada iyo caddayn ay bixisay Kaalinta Maxkamadda caddaysay is-hortagg la'aanta, lana keeno xukunka kama dambaysta ah, wuxuuna dalban karaa lacagta jeegga ku qoran.

**Qod. 73**
**Amarka Qiima-tirka Jeegga wata Shardiga ah in aan la Wareejin karin**

Marka jeegga bangiga uu wata shardiga ah " lama wareejin karo" (43), lama samayn karo amarka qiima-tirka jeegga, hasayeeshee dayn-bixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo nuqulka asalka oo kale ah (duplicate) oo uu kharashkiisa bixiyo, isagoo u gaynaya ashtakada lumista, baabi'inta ama qarinta amranaha bixinta jeegga iyo amar bixiyha jeegga.

**Qod. 74**
**Saamaynta Baabi'inta Amarka Qiima-tirka Jeegga**

Amarka qiima-tirka jeeggu wuxuu baabi'inayaa xaq kasta oo lagu lahaa jeegga la caddeeyay in aanu miradhal ahayn, hasayeeshee waxba uma dhimayo wixii natiijo qofka sita jeegga uga yimaada qiima-tirka jeegga.

## Cutubka 10aad
Xaq-Dhaca

**Qod. 75**
**Baaba'a Xaqa dib u-Weydiisiga Dhinaca kale**

1. Dib u-weydiisiga qofka sita jeegga ee liddiga wareejiyeyaalka, bixiyaha jeegga iyo kuwa kale ee ku waajiban wuxuu dhaqan ka bax noqonayaa lix bilood marka ay ka soo wareegto muddada la soo bandhigo qiima-tirka;
2. Xaqa dacwadda dib u-weydiisiga dhinaca saddeexaad ka dhaxeeya iyo kuwa kala duwan oo ay ku waajibtay lacag-bixinta jeegga bangiga midba midka kale, waxay ku dhaqan baxayaan lix bilood oo ka bilaabata maalinta ku waajibiyuhu uu bixiyay jeegga bangiga ama maalinta xaqa dib u-dalbashada lagu soo oogay isaga;
3. Xaqa dacwadda hodmidda (59) wuxuu xaq-dhac noqonayaa muddo sanad ah oo laga soo bilaabo maalinta la lumiyo xaqa ka dhashay jeegga (58).

**Qod. 76**
**Hakinta Xaq-Dhaca**

Hakinta xaq-dhaca ma saamaynayo waxaan ahayn keliya qofka arrinta hakinta ku dhacaday.

## Cutubka 11aad
Xeerarka Dhammaadka

**Qod. 77**
**Qeexidda Bangiilaha**

Marka le eego dhaqangalka xeerkaan, magaca "bangiilaha" waxaa soo galaya Urur hantiyeedka amaahda kartida u leh marka loo eego xeerka bangiga ee 14 Agoosto 1963, lamba. 18 (3, 8).

**Qod. 78**
**Waqtiga lagu Samayn karo Dokumentida la Xariira Jeegga Bangiga**

1. Soo gudbinta (3) iyo ashtakadu (45. 50) jeegga waxaa la samayn karaa keliyaha maalmaha la shaqeeyo;
2. Haddii maalinta ugu dambaysa ee muddada xeerku tilmaamayo ee ku saabsan arrimaha samaynta jeegga bangiga, gaar ahaan soo gudbinta, qaadista ashtakada ama si lagu helo wax u dhigma, ay ku soo aaddo maalin aan la shaqeyn (86 Xeerka Shaqada), muddada waxaa dib loo dhigayaa maalinta xigta ee la shaqeeyo (110, faqradda ugu dambaysa, X.H.C). Maalmaha dhextaalka ee aan la shaqeyn waxay ku jirayaan muddada la tirinayo.

**Qod. 79**
**Xisaabinta Tirada**

Sida uu qabo qodobbada uu xeerkanu sheegayo lama xisaabinayo maalinta ay arrintu bilaabanayso (377).

**Qod. 80**
**Maalmaha Xurmada leh**

Lama oggola maalmaha la xurmeeyo, ha ahadeen qaanuuni ama kuwa garsoor.

**Qod. 81**
**Qeexidda; Rugta Deegaanka; Goobta Lacag-bixinta**

Sida xeerkanu uu qabo, “rugta deegaanka” waxaa loola jeedaa goobta uu qofku degganyahay (40 x.m.), erayga “goobta lacag-bixinta” waxaa loola jeedaa dhulka dawladda hoose oo dhan.

**CINWAANKA 2AAD**
Jeegga Wareega

**Qod. 82**
**Fikriga**

1. Jeegga wareega waa dokumenti jeeg amaran oo leh qiima amaaheed, oo ay bixiso hay’ad amaah-bixin taasoo uu oggolaaday Guddiga Keydka iyo Amaahda si waafaqasan xeerka bangiga, ee ku saabsan qaddar lacaga oo la siin karo marka jeegga soo baxo, taasoo lagu bixin karo aragti goob kasta oo uu tilmaamay qofka sameeyay;
2. Hay’adda oggolatay soo saarista jeegga wareega waa in ay u sameysaa, si waafaqsan xeerkaan, dammaanada qofka sita jeegga uu ku heli karo mudnaan gaara. Xaddiga dammaanadda waxaa sanad kasta jaangoynaya Guddiga Keydka yo Amaahda, iyadoo lagu dheelli tirayo caddadka jeegagga ay hay’ad kasta soo saartay illaa laga gaarayo 31 Disembar sanadkii tagay.

**Qod. 83**
**Waxa uu Xambaarsanyahay Jeegga Wareega**

1. Jeegga wareega waa in laga helaa:
   a) magaca “jeegga wareega” oo ku dhex xardhan jeegga;
   b) ballanqaadka aan shardiga lahayn in aragti ahaan lagu bixiyo caddad lacag cayiman;
   c) tilmaanta qofka sita;
   d) tilmaanta taariikhda iyo goobta jeegga laga bixiyay;

e) tilmaanta qofka sita;
f) saxiixa hay'adda soo saartay.

2. jeegga ay ka maqantahay mid ka mida shuruudaha la soo sheegay uma qalmo jeeg wareega ahaan.

**Qod. 84**
**Dhicitaanka Xaqa dib u-weydiisiga Dhinaca Saddexaad, Xaq-dhaca, Wareejinta**

1. Haystaha jeegga xaqa dib u-weydiisiga dhinaca kale wuxuu ka dhacayaa haddii aanu la imaan jeegga soddon cisha gudahood oo laga soo bilaabo maalinta la soo sameeyay (45);
2. Dacwadda liddiga ku ah soo saaraha waxay ku xaq-dhacaysaa muddo saddex sano marka ay ka soo wareegato soo saarista;
3. Wareejinta loo wareejiyo soo saaraha jeegga waxay baabi'inaysaa jeegga.

**Qod. 85**
**Nidaamka Jeegga Wareega. Habraaca Qiima-tirka Jeegga**

1. Marka aanay la jaanqadi karin dabeecadda/nooca jeegga wareega ama si kale aanu xeerkanu u dhigin, waxaa lagu dabbaqayaa jeegga wareega xeerarka kambiyaalaha wixii la xariira wareejinta (15), lacag-bixinta (43) w.x.), ashtakada (51), xaqa dib dalbashada (49 w.x), xaq-baxa (94) iyo sidoo kale arrimha la xariira jeegagga wata saxiixa been abuurka ama dadka kartida la' (7), iyo wixii la xariira saxiixa (8); iyo waxa la xariira jeegga bangiga (40), awood siinta(42), wareejin la'aanta (43) iyo arrimaha dalxiiska (44);
2. Habraaca qiima-tirka jeegga wareega waxaa la dabbaqayaa qodobbada 69, iyo 74, oo wata isbaddalka soo socota:
   a) cabashada Dekereeta waa in la horgeeyo Guddoomiyaha Maxkamadda ee goobta ay ku taallo mid ka mida hay'adda soo saartay ama goobta uu degganyahay codsaduhu;
   b) wargelinta dekereetada qiima-tirka jeegga mid ka mida xarunta ugu dhaw hay'adda bixisay; iyado kharashka uu qabo codsadaha la wargelinayo meelaha idil ee jeegga laga bixin karo. Wixii is hortaaga waa in qoraal loogu soo gudbiyaa Maxkamadda Dekereetada soo saartay, taasoo la wargelinayo codsadaha iyo wakiilla Hay'adda;
   c) Ashtakada lumista ku saabsan Hay'adda jeegga wareega bixisay ugama masuul noqonayso qofka haysta jeegga wargelinta Dekereetada ka hor. Sidoo kale wargelinta Dekereetada ma saamaynayso masuuliyadda Hay'adda haddii jeegga laga bixiyay rug ganacsi ama meel kale oo ay ku dhacdo sabab aan loo aanayn karin Hay'adda, oo Dekereetadu aanay horay la soo gaarsiiin;
   d) Haddii uu lumo, burburo ama googo` jeegga wareega oo leh shardiga ah "lama wareejin karo" laguma samaynayo habka qiima-tirka jeegga; laakiin iibsadaha/amaahdaha wuxuu xaq u leeyahay in uu helo, labaatan cisho ka dib taariikhda ashtakada, lacag-bixinta jeegga laga bixiyay laanta ashtakada laga sameeyay.

**CINWAANKA 3AAD**
Xeerar Guud

**Cutubka 1aad**
Xeerar Ciqaab

**Qod. 86**
**Jeegga Maran**

1. Dambiga ku saabsan samaynta jeeg maran waa la ciqaabayaa sida uu qabo qodobka 498 ee Xeerka Ciqaabta;
2. Ciqaabta ku qoran qodobka la soo sheegay kala bar ayaa la dhimayaa haddii dambiiluhu uu u keeno lacag amranaha bixinta jeega inta aan jeegga loo keenin ama isla maalinta iyada ah ee lacagta la iska doonayay;
3. Dambiga la iskuma ciqaabi karo haddii arrintu ay ku timid khalad laga garaabi karo, oo qayb ka ah duruufaha lagu soo sheegay faqradda hore

**Qod. 87**
**Soo Saarista Jeegagga aan la Oggolaan**

1. Hay'adda aan loo oggolayn, ama lagala noqday oggolaashaha, oo soo saarta jeegag wareega, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ah Sh Som. 10.000-100.000, marka laga reebo in uu jiro ciqaabo kale oo xeerar gaara;
2. Maqnaanshaha oggolaashaha waxba uma dhibayso xaqa qofka si niyio wanaaga jeegga u wata in uu lacgata ka helo hay'adda soo saartay jeegga iyo in uu isticmaalo asbaabta xaqa dib u weydiisashada (45. 84).

**Cutubka 2aad**
Xeerarka Canshuurta

**Qod. 88**
**Dhaqangalka Qoraala Fulinta leh ee Jeegga Bangiga**

1. Ansaxnaanta jeegga bangiga kuma xirna ilaalinta xeerka u dagsan canshuurta. Iyagu, sikasataba, haddii aan si caadiya loo canshuurin waqtiga xeerku shegayo, ma yeelanayo taya ahaan dokumenti fulin leh (138, xarafka " c" X.H. M);
2. Qofka sita jeegga ma isticmali karo xuquuqda kambiyaalaha raacsan dokumentiga haddii aan la bixin cashuurta ku waajibtay, iyadoo la bixinayo ciqaabta ay keenayso;
3. Wax ku oolnima la'aanta jeeggu sida dokumenti la fulin karo waa in la horgeeyaa Garsooraha xitaa xaafiis ahaan.

**Qod. 89**
**Tikidhada Canshuurta (bollo) Tartiib-tartiib Korasya ama hoos u Dhacaysa ee Jeegga aan Habaysnayn**

1. Qofka haysta jeeg bangi, si uu u isticmaalo xuquuqda dib u-codsiga (45), waa inuu tusiyaa Xaafiiska canshuuraha jeegga aan habaysnayn ee tikidhka canshuurta si loo habeeyo, isagoo bixinaya canshuurta tartiib-tartiibta koraysa ama hoos u dhacaysa ee tikhidhka canshuurta (bollo) ee ku waajibtay, muddo ku siman soddon cisho oo ka bilaabata maalinta jeegga loo keenay lacag-bixinta.

**Qod. 90**
**Dabbaqidda Summadda Canshuurta go'an**

1. Qoraal kasta oo jeegga loogu qoray si wafaqsan cutubka qod. 4 (wax ku-oolnimada keliya ku aaddan lacag jirta) waa la iska doonayaa, iyadoo ka madax bannaan tikidhka canshuurta ee jeegga, waxaa jiraya canshuur kale ee tikidhka oo ah Sh. So. 10.000 ama (jajabka) 10.000, cadadka jeegga;
2. Canshuurta waxaa lagu bixiayaa iyadoo la dabbaqayo summadda iyo canshuur go'an, kuna baaba'aysa saxiixa iyo taariikhda amar bixiyaha jeegga.

**Qod. 91**
**Dabbaqidda Canshuurta Tartii-tartiibta ee Kambiyaalaha**

Marka jeegga lagu tilmaamo taariikh ka horeysay midka hadda jeegga lagu soo saaray, oo aan loogu cudurdaarin muddada waqtiga lagama maarmaanka u ah in jeeggu gaaro qofka uu u socday ama qalab kale oo aan la keeni karin, ama markasta ka duwan wax dhaafsan afar cisho marka la sameeyay, waxaa la dabbaqi karaa tartiib-tartibka canshuurta kamiyaalaha (105 L. Kamb.), marka laga reebo xeerarka ciqaabaha.